2026-27

# Hordhaca Diiwaangelinta Koorsada Dugsiga Sare



Hagaha qorsheynta koorsada Dugsiyada Dadweynaha Seattle ee loogu talagalay ardayda dhigata dugsiga sare.

Seattle Public Schools

# Shaxda Mawduucyada


## Farriin ka socota Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta 2

Macluumaadka Meelaha Laga Xariirayo Dugsiga Sare ... 3

## Shuruudaha Qalin Jabinta 4

Fasalka Qalin Jabinaya 2027 & Fasalka 2028 ... 4

Tubaha Qalin Jabinta ee Fasalka 2027 & Fasalka 2028 ... 5

Barnaamijka Aqbalaada La Dammaanad qaaday ee Washington (WAGAP) ... 6

Barashada Adeegga ... 7

Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo ... 7

Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo Is-Milicsiga ... 7

SchooLinks: Aalad Xirfadda Onlaynka iyo Qorshaynta Kulleejka ah ... 9

Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Xirfada ... 10

Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Kulleejka ... 11

Hagista Kaqeybgalka Kiridhit Labaad ... 12

Fursadaha Kudarsashada Kiridhitka Labaad ... 12

Koorsooyinka Dugsiga Dhexe ee loogu talagalay Kiridhitka Dugsiga Sare ... 13

Kiridhitka Aqoonta Luuqadaha Adduunka ... 13

Xulashada Koorsada Dugsiga Sare ee Onlaynka ah ... 13

Xarunta Xirfadaha Seattle ... 13

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Qeexitaanada 14

Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE) ... 15

Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga ... 23

Caafimaadka ... 26

Xisaabta ... 27

Barashada Jimicsiga Jirka ... 29

Sayniska ... 33

Cilmiga Bulshada ... 35

Bandhiga Fanka & Farshaxanka ... 39

Luuqadaha Adduunka ... 43

# Farriin ka socota Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta

Qalin Jabiyaha Sharafta leh ee ***Mustaqbalka*** ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle,

Waxyaabaha soo socdo waa hordhac ku saabsan nidaamka diiwaangelinta koorsada dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle ee sanad dugsiyeedka 2026-27. Waxaa loogu talagalay inay kaa caawiso sameynta go'aanno xog ogaal ah, oo waxbarasho oo aad ugu diyaargaroobeyso mustaqbalkaaga iyo inay dhammeystir u noqdaan macluumaadka aad ka hesho dugsigaaga sare.

Macalimiinteena iyo shaqaalaheena waxa ay ku dadaalaan inay ku siiyaan khibrad adag oo macno leh inta ay ku barayaan xirfadaha kuu diyaarin doona xulashooyinka dugsiga sare kadib ah. Hagitaanka kujira hordhacan wuxuu kuu oggolaanayaa inaad abuurto barnaamijka afarta sano ah ee sida ugu wanaagsan kuugu shaqeeyo. Isticmaal hagahan inta aad isu diyaarineyso sannad dugsiyeedka xiga iyo wixii ka dambeeya.

Qorshahaaga waxbarasho iyo fasalada aad doorato in aad qaadato waa kuwo aad muhiim u ah. Qaado wakhti aad kaga fakarto xulashooyinkaaga. Xaqiiji inaad qaadato koorsooyin caqli ahaan kuu xujeynaya kuuna oggolaanaya inaad sahmiso xirfado iyo hibooyin cusub.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay doonayaan in ardayda oo dhami ay helaan oo ay guul ka gaaraan koorsooyin adag, gaar ahaan koorsooyinka sare si aad u qalin jabiso adiga oo diyaar u ah fursadaha dugsiga sare kadambeeya. Kuwaan waxaa kamid ah koorsooyinka Meeleynta Sare, Dugsiyada Caalamiga ah ee Sare, Kulleejka Dugsiga Sare, iyo barnaamijyada Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada ee kiridhitka labaad.

Waxaanu rajeyneynaa in dukumiintigani kaa caawin doono bixinta hagida guud ee dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle. Waxaa kujira soo koobida shuruudaha qalin jabinta, Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeya, iyo isku xigitaanka dhinaca casharada koorsada ee lagu taliyey.

Haddii aad qabto su'aalo kusaabsan koorsooyin gaar ah ama qorshahaaga afarta-sano ah, fadlan la xiriir macalin, lataliye, ama maamulaha jooga iskuulkaaga. Adiga ayey halkaan kuu joogaan. Inta aad isu diyaarineyso qorsho u sameynta sanadaha soo socda ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle, waxaanu kugu dhiirigelineynaa inaad tixgeliso waxyaabaha soo socda:

- **Sannad kasta waa muhiim!** U diyaargarowga kulleejka iyo xirfada shaqada waxa uu bilaabmaa goorta hore ee bilaabida dugsiga barbaarinta ubadka waxa uuna sii socdaa ilaa dugsiga sare iyadoo fasalka 9aad uu yahay sanad si gaar ah muhiim ugu ah.
- **Wax saadaali!** Saadaasha ugu wanaagsan ee guusha kulleejku waa dhammaystirka manhajka dugsiga sare ee adag.
- **Dejiso yoolalkaaga!** Qiimee waxa aad rabto inaad sameyso, kadib qor qorshe aad rabto inaad ku gaarto yoolkaas.
- **Waqtiga wax la bilaabo waa hadda!** Goor hore bilow si aad u go'aamiso oo aad u baarto shuruudaha heerka gelitaanka ee kulleej ama xirfad shaqo oo gaar ah.
- **Xoog ku dhammee!** Qorshee inaad naftaada xujeyso inta lagu jiro sannadkaaga u dambeeya.
- **Soo bandhig waxa aad ka fikireyso oo aad qorsheyneyso!** Hannaankan kala hadal qoyskaaga oona la wadaag yoolalka barnaamijkaaga dugsiga sare. Xubnaha katirsan qoyskaaga waa shuraako muhiim u ah horumarinta Qorshahaaga Dugsiga Sare & Wixii Kadambeeyo.

Waxaanu kuu rajeyneynaa guul adiga oo ka faa'iideysanaya fursadaha ugu badan ee laga heli karo Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

Si daacad ah,

Dr. Mike Starosky,
Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta

# Macluumaadka Meelaha Lagala Xariirayo Dugsiga Sare

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booqo www.seattleschools.org/schools/

## Alan T. Sugiyama High School

8601 Rainier Ave. S
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-6600

## Ballard High School

1418 NW 65th St.
Seattle, WA 98117
Xafiiska Guud: 206-252-1000

## Cascade Parent Partnership Virtual Option

2919 1st Ave. W
Seattle, WA 98119
Xafiiska Guud: 206-743-3900

## Chief Sealth International High School

2600 SW Thistle St.
Seattle, WA 98126
Xafiiska Guud: 206-252-8550

## Cleveland High School

5511 15th Ave. S
Seattle, WA 98108
Xafiiska Guud: 206-252-7800

## Franklin High School

3013 S Mt Baker Blvd.
Seattle, WA 98144
Xafiiska Guud: 206-252-6150

## Garfield High School

400 23rd Ave.
Seattle, WA 98122
Xafiiska Guud: 206-252-2270

## Ingraham High School

1819 N 135th St.
Seattle, WA 98133
Xafiiska Guud: 206-252-3880

## Interagency Academy

3528 S Ferdinand St.
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-743-3930

## Lincoln High School

4400 Interlake Ave. N
Seattle, WA 98103
Xafiiska Guud: 206-413-2500

## Middle College High School

1701 Broadway Seattle, WA 98122
BE Building – Room 3135

9600 College Way North
Seattle, WA 98103
IB Building - Room 3311
Xafiiska Guud: 206-252-6600

## Nathan Hale High School

10750 30th Ave. NE
Seattle, WA 98125
Xafiiska Guud: 206-252-3680

## Nova

2410 E Cherry St.
Seattle, WA 98122
Xafiiska Guud: 206-252-3500

## Rainier Beach High School

8815 Seward Park Ave. S
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-6350

## Roosevelt High School

1410 NE 66th St.
Seattle, WA 98115
Xafiiska Guud: 206-252-4810

## Seattle World School

1700 E Union St.
Seattle, WA 98122
Xafiiska Guud: 206-252-2200

## Xarunta Xirfadaha Seattle

2200 South Lane Street
Seattle, WA 98144
Xafiiska Guud: 206-252-0730

## The Center School

305 Harrison St.
Seattle, WA 98109
Xafiiska Guud: 206-252-9850

## West Seattle High School

3000 California Ave. SW
Seattle, WA 98116
Xafiiska Guud: 206-252-8800

# Shuruudaha Qalin Jabinta

Ardayda kujirta Fasalka 2021 iyo wixi kadambeeya waa iney helaan 24 dhibcood si ay u qalin jabiyaan. Shuruudaha qalin jabinta ee cusub waxaa waajibiyey Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Washington. Gudigu waxa uu ugu talagalay shurduudaha cusub inay noqdaan labadaba kuwa adag oo dabacsan iyo in lagu taageero himilada nidaamka waxbarashada oo dhammaan ardayda u diyaarinaya kulleejka, xirfada shaqada, iyo nolosha.

## Fasalka Qalin Jabinaya 2027 & Fasalka 2028[a]

### Shuruudaha Koorsada ee 24-ka Kiridhit

**Af-Ingiriisiga:** 4 Kiridhit

- Hordhaca Suugaanta iyo Curiska 9, LGBTQIA Hordhaca Suugaanta iyo Curiska
- Suugaanta Adduunka iyo Curiska 10
- Suugaanta iyo Curiska Mareykanka 11, Daraasaadka Qowmiyaadka ama Suugaanta iyo Curiska LGBTQIA 11, Suugaanta iyo Curiska Afrikaanka, Eeshiyaanka, Laatiinka, ama Dhaladka ee Mareykanka 11, Luuqada iyo Curiska AP, Luuqada iyo Suugaanta IB 11, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS) dhexdiisa ah.
- Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12, Luuqada iyo Curiska AP ama Suugaanta iyo Curiska AP, Luuqada iyo Curiska IB ee loogu talagalay fasalka 12aad, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS)

**Cilmiga Bulshada:** 3 Kiridhit

- Taariikhda Adduunka 1
- Taariikhda Adduunka 2, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 2, Taariikhda Adduunka AP: Casriga, ama Juqraafiga Aadanaha AP A
- Taariikhda Adduunka 3, Taariikhda Adduunka AP 2, ama Juqraafiga Aadanaha AP B, Daraasaadka Dadka Madow Taariikhda Adduunka 3, ama Taariikhda Adduunka LGBTQIA 3
- Taariikhda Mareykanka, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Ameerika IB, Taariikhda Mareykanka AP, Daraasaadka Qowmiyaadka Mareykanka CIHS 151, CIHS 147 iyo 148, Daraasaadka Dadka Madow Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Mareykanka Filipinx, ama Taariikhda Mareykanka Latinx
- Dowladda iyo Rayidka Mareykanka, IB Qarniga 20aad, ama AP Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda
- Shuruudaha qalin jabinta Taariikhda Gobolka Washington, kiridhit lama bixiyo

**Xisaabta:** 3 Kiridhit

- Aljebra 1
- Joomitiri
- Aljebra 2, Xisaabta IB SL Sanadka 1, Aljebraha Dhaqaalaha, Xisaabta Ganacsiga 130, ama koorso aad u horumarsan oo isku xiga xisaabta ah ama koorsada xisaabta CTE ee la ansixiyay.

**Sayniska:** 3 Kiridhit

- Fiisikiska A/Kimistiriga A
- Baayolajiga A/Baayolajiga B
- Fiisikiska B/Kimistiriga B ama ka dooro koorsada la bixiyo ee aasaasiga ah ee la oggolaaday ama koorsooyinka u dhigma ee OSPI-ansixisay ee waxbarashada shaqada iyo farsamada (CTE).

**Career Connected Learning (Xirfadda Barashada Ku Xiran, CTE):** 1 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

**Caafimaadka:** 0.5 Kiridhit

- 0.5 Caafimaadka ama Caafimaadka Qoyska

**Barashada Jimicsiga Jirka:** 1.5 Kiridhit

- Ku Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed
- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday

**Bandhiga Fanka iyo Farshaxanka:** 1 ilaa 2 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

**Koorsooyinka Diyaargarowga ee Shakhsi Ahaaneed** (Luuqadda Adduunka, Fanka, Sayniska, iwm.): 2 ilaa 3 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

**Ikhtiyaarada:** 4 Kiridhit

- Koorso kasta oo aan ka ahayn koorsooyinka kor lagu soo sheegay.

**Wadarta:** 24 Kiridhit

[a] *Fadlan la soco in shuruudaha qalin jabinta ee Fasalka 2028 wali la soo gabagabeynayo laakiin la filayo inay aad ugu ekaadaan kuwa Fasalka 2027. Macluumaadki iyo faahfaahinadi ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha qalin jabinta SPS, fadlan gal: https://www.seattleschools.org/departments/graduation-requirements/*

# Tubaha Qalin-Jabinta ee Fasalka 2027 & Fasalka 2028[b]

Ardaydu waa inay dhammeystiraan ugu yaraan hal Qalin Jabin oo Diyaargarowga ah laakiin waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dhammaystiraan inta ugu badan ee la jaan qaadi kara shaqadooda iyo yoolalka waxbarasho. Laga bilaabo Fasalka 2020, gobolka wuxuu meesha ka saaray shuruudi imtixaanka gobolka wuxuuna ku beddelay xulashooyin dariiq koorso ah oo kala duwan kuwaasoo loo shakhsiyadayn karo danaha ardayga. Waxaa jira siyaabo badan oo ay ardaydu ku buuxin karaan shuruudaha dariiqa qalin jabinta: dhammeystirka dariiqyada qalin jabinta Xisaabta iyo Ingiriisiga; dhammeystirka 2 kiridhit ama ka badan oo CTE ah oo laga dhammeeyo isla hal aag barnaamij; ama dhibco gaar ah oo laga keensado ASVAB (imtixaanka Ciidamaha Qalabka Sida). Wixi macluumaad dheeraad ah, u tixraac webseedka OSPI ama raac linkigan.

## Diyaargarowga ELA

*Gaar ugu yaraan hal xulasho ELA ah oo ka mid ah xulashooyinka la taxay*

### Koorsooyinka ELA

- Koorsooyinka Ingiriisiga ee Running Start
- Koorsooyinka Ingiriisiga ee CIHS
- Af-Ingiriisiga Lagu Tagayo Kulleejka oo leh darajada D ama kabadan

*1.0 Kiridhit oo leh darajada C+ ama ka badan, ama leh dhibcaha imtixaan uqalmaya:*

- Luuqada iyo Curiska AP
- Suugaanta iyo Curiska AP
- Daraasaadka Afrikaanka Maraykanka AP
- Juqraafiga Aadanaha AP
- Dhaqaalaha AP
- Cilmi-nafsiga AP
- Taariikhda Maraykanka AP
- Taariikhda Adduunka AP
- Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda AP
- Isbarbardhigga Dowladda iyo Siyaasadda AP ama Shakhsiyaadka iyo Bulshada IB ama Koorsooyinka Luqadda/Suugaanta Af-Ingiriisiga IB oo leh darajada C+ ama ka badan (ama leh dhibcaha uqalmaya Imtixaanka AP/IB)

### Imtixaanaadka ELA:

- SBA ELA(2548)
- WA-AIM(104)
- SAT(410)
- ACT (14)

## Diyaargarowga Xisaabta

*Gaar ugu yaraan hal xulasho oo xisaabta ah oo ka mid ah xulashooyinka la taxay*

### Koorsooyinka Xisaabta

- Koorsada Isla Bilaabida xisaabta
- Koorsada xisaabta Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa
- 1.0 kiridhit Xisaabta Lagu Tagayo Kulleejka
- Istaatiitikada AP, Kombiyuutar Sayniska AP A, Mabaadii'da Kombiyuutar Sayniska AP, Kaakulaasta Hore AP, Kaalkulaas AP, koorsada Xisaabta IB, Sayniska Kombiyuutarka IB (darajada C+ ama ka sare teeram kasta)

### Imtixaanaadka Xisaabta:

- Xisaabta SBA (2595)
- WA-AIM (103)
- SAT (430)
- ACT (16)
- Istaatiitikada AP, Kombiyuutar Sayniska AP A, Mabaadii'da Kombiyuutar Sayniska AP, Kaakulaasta Hore AP, Kaalkulaas AP (3 ama ka sare)
- Koorsada Xisaabta IB (4 ama ka sare)
- Sayniska Kombiyuutarka IB

## Diyaargarowga Shaqada & Farsamada

*2.0 Kiridhit hal Aag oo ah Barnaamijka CTE*

- Culuumta Beeraha
- Ganacsiga iyo Suuqgeynta
- Cuno karinta iyo Soo dhaweynta
- Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha
- Caafimaadka iyo Daawada
- Tignoolajiyadda Macluumaadka
- Fanka Warbaahinta
- Ganacsiga Xirfada Leh
- STEM

## U Diyaargarowga Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga (ASVAB)

Qaado Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga oo leh Darajada 31 ama ka badan

### Furaha:

- SBA = Imtixaanka Dheellitiran ee Smarter (imtixaanka dhamaadka-sanadka ee Xisaabta iyo Faniga Luqadda Af-Ingiriisiga ee uu u baahan yahay Gobolka Washington)
- WA-AIM = Helitaanka Washington ee Waxbaridda & Cabbiraadda (imtixaan kale oo ku saleysan heerarka guusha ee kale ee la waafajiyay Heerarka Gobolka Aasaasiga ee Guud oo loogu talagalay ardayda sida weyn naafada uga ah garaadka)
- SAT waagi hore u taagneyd "Imtixaanka Kartida Aqoonta" (imtixaanka heerka gelitaanka kulleejka oo cabiraya akhris-qoraalka ardayga, xisaabta, iyo xirfadaha wax qorista)
- AP = Meeleynta Sare
- IB = Dugsiga Caalamiga ah
- CIHS = Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa
- STEM = Sayniska, Tignoolajiyada, Injineerinka, Xisaabta

[b] *Fadlan la soco in shuruudaha qalin jabinta ee Fasalka 2028 wali la soo gabagabeynayo laakiin la filayo inay aad ugu ekaadaan kuwa Fasalka 2027. Macluumaadki iyo faahfaahinadi ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha qalin jabinta SPS, fadlan gal: https://www.seattleschools.org/departments/graduation-requirements/*

# Barnaamijka Aqbalaada La Dammaanad qaaday ee Washington (WAGAP)

Laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2026-2027, Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay la shuraakoobeen Barnaamijka Aqbalaada La Dammaanad qaaday ee Washington (WAGAP) si ay ardaydeena qalin-jebinaysa uga caawiyaan damaanada in laga aqbalo inay dhigtaan lix kulleejyo ama jaamacado gobol oo afar sano ah.

Barnaamijka Aqbalaada La Dammaanad qaaday ee Washington (WAGAP) dammaanadda aqbalaada inay dhigtaan mid ka mid ah kulleejyadaan ama jaamacadahaan dawliga ah ee afarto sano ah ee Washington:

- Central Washington University
- Eastern Washington University
- The Evergreen State College
- University of Washington Tacoma
- Washington State University
- Western Washington University

Ardayda buuxisa shuruudaha, ama haya dhabbaha buuxinta shuruudaha, waxaa loo dammaanad qaadayaa in laga aqbalo dhammaan lixda machad ee kaqaybqaadanaya.

Barnaamijka WAGAP waxa uu dhawaan sameeyay webseed cusub oo ka caawinaya qoysaska iyo ardayda inay si fiican u fahmaan una helaan barnaamijkooda. Webseedka hadda ka gal barta wacollegeguarantee.org.

## Barashada Adeegga

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay ardayda kaga baahan yihiin inay dhammeystiraan 60 saacadood oo adeeg barashada ah kahor inta aysan qalin jabin.

Barashada adeegga dhexdeeda, ardaydu waxa ay xirfadahooda waxbarasho iyo aqoontooda ku dabaqaan goobaha nolosha dhabta ah. Dugsiyada si gaar ah ugala xariir si aad uga hesho macluumaad gaar ah.

## Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo

Qorshaynta dugsiga sare iyo wixi ka dambeeyo waa hannaan ardayda lagu barayo rajada mustaqbalka. Rajadu waxay leedahay yool, iyadoo la arkayo dariiqa iyo wakaaladda si loo gaaro. Qorshaynta dugsiga sare iyo wixi ka dambeeyo waxay ardayda oo dhan u oggolaataa in ay:

- Ku lug yeeshaan waxqabadyada sahminta xirfadda shaqo si ay u kiciyaan fikradaha mustaqbalka,
- Milicsadaan oo ay xoojiyaan xirfadaha loo baahan yahay dugsiga sare iyo wixi ka dambeeyo
- Waa madasha loo adeegsado in lagu abuuro qorshe diiwaangelinaya halbeegyada loo baahan yahay in aad ku gaarto yoolalkaaga
- Dib loogu eego heerka fasal kasta si looga tarjumo xirfadaha la bartay iyo horumarinta xirfadaha
- Saxaan ama cusboonaysiiyaan marka fikrado ama khibrado cusub ay badalaan dariiqaaga
- Tilmaanta Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo, sida ugu wanaagsan, waxay isku dhaftaa horumarinta Dareenka Bulshonimo, Xirfadaha Qarniga 21aad, iyo isku xirka tacliinta.

Dhaqanka u diyaarsanaanta kulleejka iyo xirfada shaqada waxaa kamid ah is-fahmida, sahminta xirfada shaqada, horumarinta xirfadda, iyo qorsheynta xirfada shaqada.

### 1) Is-fahmida

Marka koowaad: ogow adiga naftaada, danahaaga, iyo awoodahaaga.

Aqoonta ka raadi bulshadaada iyo qoyskaaga, awoodahaaga wadajirka ah, iyo xigmadda la wadaago. Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxa uu adeegsadaa aalado waxyaabahaas waafajinaya xirfadaha shaqooyinka. Waxaa laga yaabaa inaad kahesho wax lama filaan ah.

### 2) Sahminta Xirfada Shaqada

Barashada iyo la kulanka shaqooyinka kala duwan waxa ay muhiim u tahay in la gaaro go'aanno xog ogaal ah. Sahminta waxa ay ku saabsan tahay aragtida danaha kala duwan, xirfadaha, iyo qiimayaal kujira xulashooyin badan.

Sidee danahaaga iyo xirfaddaadu ugu xiran yihiin xulashooyinka koorsadeena? Xirfado noocee ah ayey dadku u baahan yihiin in looga shaqaaleeyo shaqooyin kala duwan? Sidee ayaad ku aqoonsaneysaa tababarka loo baahan yahay si loo gaaro shaqooyinkaas?

### 3) Horumarinta Xirfadda

Dejinta Hadafka, xallinta dhibaatada, go'aan qaadashada, iyo adkeysiga ayaa ah tusaalooyinka xirfadaha looga baahan yahay fasalka, shaqada, iyo guusha nolosha. Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxa uu ka caawiyaa ardayda inay horumariyaan xirfadahaan. Ardaydu sidoo kale waxa ay bartaan xirfadaha risiyuumka codsiga shaqada iyo wax badan oo ka caawinaya iney guul ka gaaraan shaqada adduunka.

### 4) Qorsheynta Xirfada Shaqada

Waxaad horumarin doontaa aragtiyo waxaadna horumarin doontaa xirfado aad ku raadsato shaqooyinka, dhisida risiyuumka codsiga shaqada, qorsheynta kulleejka, qorsheynta kharashka kulleejka (kaalmada dhaqaale), ku habboonaanshaha kulleejka iyo xirfada shaqada, iyo kuwa kale oo badan.

U diyaarsanaanta kulleejka iyo xirfada shaqada waxa ay ku saabsan yihiin adeegsiga tacliinta, shucuurta bulshada, iyo xirfadaha shaqo ee nolosha iyo shaqada adduunka. Waxa aad sidoo kale wax kabaran doontaa caadooyinka shaqada, barashada adeegga, iyo kobaca shaqada.

U diyaar ahaanshaha kulleejka waa hal tallaabo oo loo qaaday hannaanka u diyaarsanaanta xirfada ee xirfadooyinka badan.

Qorshahaagu waa aalad ***iyo*** hannaan aad u isticmaaleysid inaad ku qeexdo yoolalkaaga xirfadaha shaqada iyo sameynta go'aano xog ogaal ah.

Hannaanku waxa uu kusaabsan yahay baarista danahaaga iyo awoodahaaga aad ku baareyso yoolalkaaga. Intaa kadib waxa aad dib u qiimeyn doontaa inta aad wax badan ka baraneyso naftaada iyo ikhtiyaarahaaga shaqo.

Tani waxa ay ku saabsan tahay taageerida adiga; qoyskaaga iyo odayaashaada; qeexida iyo kobcinta yoolalkaaga inta aad kusii jirto safarkaaga.

## Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo Is-Milicsiga

Qorshahaagu waa inuu ka tarjumadaa ***yoolalkaaga***.

Habka loo abuuro qorshahaagu waxa uu gacan kaa siinayaa in aad yeelato xirfado aad adeegsan karto waqti kasta oo aad rabto inaad isbeddel ku sameyso koorsooyinka, yoolalka mustaqbalka, shaqada, iyo in kale oo badan.

Doorashada xirfad ma ahan wax kasta, kaliya waa hal qeyb oo mustaqbalkaaga ah. Had iyo jeer waxaa jira isxilqaan, diin, beel, waxqabad, iyo fursado kale. Diirada qorshahan ayaa ah in lagaa caawiyo inaad sameysato hadaf shaqo; hase yeeshee, ma rabno inaan ilaawin ama iska indho tirno inay jiraan habab badan oo lagu helo danahaaga, iyo siyaabo loogu doodo laguna xuso bulshadaada ka baxsan adduunka shaqada.

Waxaanu diiradda saari doonnaa qeybaha soo socda si aan kaaga caawino inaad gaarto go'aannadaada dugsiga sare ka dib:

## Is-fahmida

- Maxaan jeclahay?
- Maxaa i xiisa galiya?
- Waa maxay awoodahayga?

## Waa maxay waxa aan rabo?

- Fasalo noocee ah ayaa buuxinaya shuruudaha qalin jabinta iyo hadafkeyga shaqo?
- Waa maxay shaqooyinka aan xiiseynayo?
- Maxaan rabaa inay noqdaan koorsooyinkeyga diyaargarowga?
- Waa maxay shahaadada ama dhigriiga aan u baahanahay inaan ku gaaro yoolalkeyga xirfada shaqada?

## Sideen ku tagi karaa halkaas?

- Waa maxay Kulleejyada ama tababbarada leh barnaamijka aan doonayo?
- Si sax ah ma iigu habboon tahay? Ma dugsi weyn baa mise mid yar?
- Guriga ma u dhow yahay mise wuu ka fog yahay? Miyuu magaalada u dhow yahay mise wuu ka fog yahay?
- Waa maxay fasalada aan u baahanahay inaan galo?
- Waa maxay khibradaha ku xiran shaqada ama barashada adeegga ee i siin doona xirfadaha aan u baahanahay?
- Waa maxay aqoonsiyada aan u baahanahay?
- Meeqa ayuu joogaa qiimaha?
- Miyaan u qalmi doonaa kaalmada dhaqaale? Ka waran faa'iidada deeqaha waxbarasho?
- Ma u baahnaan doonaa inaan qaato amaahda ardaydeena?

## Dib-u-eeg sanad walbo oo sixitaanno samee

- Nolosha waxaan mararka qaarkood u baahan nahay inaan sameyno isbeddelo marka aanu baranno waxyaabo cusub oo ku saabsan nafteena, shaqooyinkeenna, ama qorshayaasheena. Sanad kasta inta aad ka shaqeyneyso qorshahaaga waxaad had iyo jeer ku sameyn kartaa isbeddelo.
- Cusbooneysii diyaargarowgaaga ama qorshaha koorsada 4-ta sano
- Beddel yoolalkaaga shakhsi ahaaneed
- Ka hel taageero iyo jawaab celin waalidkaaga/ daryeelahaaga/ qof kaaweyn ama lataliyaha iskuulka

# SchooLinks: Aalad Xirfadda Onlaynka iyo Qorshaynta Kulleejka ah

Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxay u guurayaan Habka Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo ee cusub laga bilaabo dayrta 2026! SchooLinks waa madal taageerta qorsheynta xirfadda shaqada iyo kulleejka ee ardayda. SchooLinks waxay bixisaa hal meel oo ay ardaydu ka buuxiso kalana socoto qayb kasta oo ka mid ah HSBP. Ardayda waxay SchooLinks u adeegsan doonaan inay ku ogaadaan xiisahooda iyo waxa ay ku fiican yihiin, sahamiyaan kulleejyada iyo xirfadaha, oo ay abuuraan xirfad shakhsiyeed iyo qorshe tacliimeed oo sida ugu fiican uga tarjumaya yoolalkooda dhibloomada ka dib.

Si gacan looga gaysto hannaanka Qorsheyntooda Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo, ardaydeenna fasalka 6aad-12aad waxay isticmaalaan SchooLinks si ay isku qiimeeyaan, u sahmiyaan dariiqyada shaqada, u raadiyaan deeqo waxbarasho iyo fursado waxbarasho oo ku salaysan shaqada, iyo qaar kaloo badan.

## Sida ardayda ay u Galayaan SchooLinks

Ardayda waxay SchooLinks ka galaan madasha ardayga ee SPS Clever

Madasha ardayga iyo SchooLinks waxaa labadaba laga gali karaa iskuulka iyo guriga. Arday kasta waa in uu ogyahay magaca iyo lambar sireedka degmadooda si ay u galaan madasha ardayga. Ardayda waxay la xiriiri karaan macalin kasta ama maktabad hayaha si looga caawiyo magaca ay ku isticmaalaan iyo lambar sireedkooda. Wax badan ka ogow Madasha Ardayga ee Clever.

## Sida Waalidka/Mas'uulka Ku Galayo SchooLinks

Gelitaanka waalidka/mas'uulka waa un eegis kaliya iyo awoodda kulleejyada aad ugu darto liiska kulleejka mustaqbalka ee ardaygaaga.

U-dulmarka waalidka/dadka ardayda masuulka ka ah

Si aad u codsato koonto waalid, la xiriir Kooxda La-talinta Dugsiga oo ku dar magaca dugsiga iyo dugsiga uu dhiganayo.

**Fiiro Gaar ah:** Waa in aad leedahay koonto Source ah si aad u hesho koontada waalidka/mas'uulka ee SchooLinks. Haddii aadan hadda lahayn koonto Source ah, mid samayso adigoo raacaya tilmaamaha furashada.

Marka aad iska diiwaangeliso koontada SchooLinks, waa ay kuu furnaan doontaa ilaa inta ardaygaaga uu "doorto inuu ku jiro" SchooLinks oo uu ka diiwaangashan yahay degmada, oo aad leedahay koonto Source ah oo kuu furan, lagaagana aqoonsado nidaamka xogta ardayga in aad tahay waalid ama qof mas'uul ka ah ardayga. Si aad u codsato in lagaa caawiyo SchooLinks, fadlan la xiriir Kooxda La-talinta Dugsiga.

## Kheyraadka waalidiinta/mas'uuliyiinta:

- Gal koontada barta Source
  - Caawimaada koontada Source: sourcesupport@seattleschools.org
- Gal Madasha Ardayga ee Clever
- Sida loo furto koontada Source
- Sida Ardaydu SchooLinks uga Galayaan iskuulka iyo guriga

## Gelitaanka SchooLinks ee Ardayda Qalin-Jabisay

Ardayda waxay iimaylkooda shakhsi ahaaneed ku bixin doonaan waxqabadkooda SchooLinks ee sanadka u dambeeya. Ciwaanka iimaylkan ayay ku gali doonaan SchooLinks marki ardaydu ay qalin-jebiso.

## Caawimada SchooLinks Xilliga Kulaylaha

Haddii aad caawimo ubaahato xilliga kulaylaha, codsi taleefan lambar ku gudbi Let's Talk haddii ay suurtagal tahay, iyo sharraxaad kooban oo ku saabsan arrintaada ama su'aashaada. Waxaad sidoo kale farriin cod ah ku reebi kartaa 206-743-3600.

La xiriir Kooxda La-talinta adigoo adeegsanaya Let's Talk

Waxyaabaha soo socdo waa waraaqo-shaqo si ay kaaga caawiyaan go'aaminta danahaaga xirfada shaqo iyo fursadaha dugsiga sare ee kadib ah ee kaa caawin doona inaad hesho shaqooyinkaas. Tani waxa ay sidoo kale kaa caawin doontaa inaad go'aamiso koorsooyinka aad rabto inaad qaadato inta lagu jiro dugsiga sare.

## Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Xirfada

Aynu soo aruurino xoogaa macluumaad ah si aan go'aanno uga gaarno xirfadaada shaqo iyo yoolalka waxbarasho ee dugsiga sare kadambeeya.
Wixi macluumaad dheeraad ah ka hel SchooLinks.

| Xirfada 1 | Xirfada 2 | Xirfada 3 |
|---|---|---|
| **Jagada Xirfada/Shaqada:** | **Jagada Xirfada/Shaqada:** | **Jagada Xirfada/Shaqada:** |
| **Tababar noocee ah ee dugsiga sare kadib ama waxbarashada ayaa loo baahan yahay?:** | **Tababar noocee ah ee dugsiga sare kadib ama waxbarashada ayaa loo baahan yahay?:** | **Tababar noocee ah ee dugsiga sare kadib ama waxbarashada ayaa loo baahan yahay?:** |
| **kharashka:** | **kharashka:** | **kharashka:** |
| **Mushaarka Heerka Galitaanka Sanadlaha ee Seattle:** | **Mushaarka Heerka Galitaanka Sanadlaha ee Seattle:** | **Mushaarka Heerka Galitaanka Sanadlaha ee Seattle:** |
| **Mushaarka lagu noolaan karo ee Sanadlaha ee Seattle:** (Mushaarka Saacadiiba X 37.5 saacadood toddobaadkiiba X 52 toddobaad sanadkiiba ee shaqada wakhtiga buuxa) | **Mushaarka lagu noolaan karo ee Sanadlaha ee Seattle:** (Mushaarka Saacadiiba X 37.5 saacadood toddobaadkiiba X 52 toddobaad sanadkiiba ee shaqada wakhtiga buuxa) | **Mushaarka lagu noolaan karo ee Sanadlaha ee Seattle:** (Mushaarka Saacadiiba X 37.5 saacadood toddobaadkiiba X 52 toddobaad sanadkiiba ee shaqada wakhtiga buuxa) |

### Su'aalaha la Tixgeliyo

**Maxaa muhiim kuu ah ee ku jira xirfad shaqo?**

**Xirfadaha shaqo ee aad fiirineyso miyey ku jiraan wax adiga muhiim kuu ah?**

**Haddii ay maya ay tahay, sidaas maku qanacsan tahay?**

**Ma isxilqaami kartaa ama ku dari kartaa danahaaga siyaabo kale?**

**Ma u aragtaa qiimaha tababarka inuu u qalmo mushaarka shaqada aad dooratay?**

## Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Kulleejka

Maxaa ay yihiin waxyaabaha aad dareento inay aad ugu muhiimsan yihiin guushaada? Miyey kaalmada dhaqaale ee aad hesho dabooshaa dhammaan kharashaadka kulleejka? Wixi macluumaad dheeraad ah ka hel SchooLinks. Waxaad midan waxbadan uga hadli doontaa inta lagu jiro mid kamid ah casharadaada Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo.

| Kulleejka 1 | Kulleejka 2 | Kulleejka 3 |
|---|---|---|
| **Magaca** (Kulleejka/Jaamacada): | **Magaca** (Kulleejka/Jaamacada): | **Magaca** (Kulleejka/Jaamacada): |
| **Takhasusyada Ugu Weyn** (Aan daneynayo): | **Takhasusyada Ugu Weyn** (Aan daneynayo): | **Takhasusyada Ugu Weyn** (Aan daneynayo): |
| **Goobta** (Caasimada/Magaalada ama Degmada/Baadiyaha): | **Goobta** (Caasimada/Magaalada ama Degmada/Baadiyaha): | **Goobta** (Caasimada/Magaalada ama Degmada/Baadiyaha): |
| **Cabbirka (**Arday Badan ama Arday Yar): | **Cabbirka (**Arday Badan ama Arday Yar): | **Cabbirka (**Arday Badan ama Arday Yar): |
| **Gaar loo leeyahay ama Dawladeed:** | **Gaar loo leeyahay ama Dawladeed:** | **Gaar loo leeyahay ama Dawladeed:** |
| **Mid Diimeed ama Calmaani, Iskudhaf ama Aan Ahayn:** | **Mid Diimeed ama Calmaani, Iskudhaf ama Aan Ahayn:** | **Mid Diimeed ama Calmaani, Iskudhaf ama Aan Ahayn:** |
| **Guri Kambaaska dhexdiisa ama Kabaxsan Kambaaska:** | **Guri Kambaaska dhexdiisa ama Kabaxsan Kambaaska:** | **Guri Kambaaska dhexdiisa ama Kabaxsan Kambaaska:** |
| **Heerka Meeleynta Shaqada:** | **Heerka Meeleynta Shaqada:** | **Heerka Meeleynta Shaqada:** |
| **Wadarta Qiimaha:** | **Wadarta Qiimaha:** | **Wadarta Qiimaha:** |
| **Qaddarka Xirmada Gargaarka Maaliyadeed:** | **Qaddarka Xirmada Gargaarka Maaliyadeed:** | **Qaddarka Xirmada Gargaarka Maaliyadeed:** |

## Hagista Kaqeybgalka Kiridhit Labaad

Kaqeybgalka kiridhitka labaad ayaa la ballaariyay si loogu daro ardayda matalaadda yar, sida kuwa ka soo jeeda asal-dhaqaale hoose, ardayda naafada ah, iyo Bartayaasha Ingiriisiga. Xog cad oo ku saabsan barnaamijyada kiridhitka labaad iyo taageerada dhaqaale ee la heli karo ayaa la bixiyaa si loo xaqiijiyo in ardaydani ka qayqaadan karaan. Waxaa hoos ku yaallo fursadaha loogu talagalay ardayda in ay ku kasbadaan kiridhit labaad si bilaash ah. Ardayda iyo qoysaska waa in ay buuxiyaan foomamka lagama maarmaanka ah si ay u helaan kaalmo dhaqaale oo ay dabagalaan kulleejyada si ay u xaqiijiyaan wareejinta kiridhitka ee saxda ah. Intaa waxaa dheer, shuruudaha uqalmitaanka ee caawimaad kasta oo dhaqaale oo la heli karo ee la xiriira helitaanka barnaamijka ama heerka fasalka ee Running Start, waa in la tixgeliyaa.

### Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa

Diiwaangelinta kiridhitka kulleejka waxay ka bilaabataa waraaqda natiijada kulleejka ee Machadka Tacliinta Sare (IHE).

Beddelka Xeerka Guurtida (SSB) 5048 waxa uu meesha ka saaray khidmadaha CiHS ee ardayda dhigata dugsiyada dawlada waxa uuna keenay qaab maalgelin toos ah oo loogu talagalay kulleejooyinka iyo jaamacadaha dadweynaha.

Iyadoo danaynta CiHS ay sii kordhayso oo kulleejyo badan ay doonayaan in ay la shuraakoobaan degmooyin cusub, Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI) waxa uu bixiyaa talooyinkaan iyo xusuusinadaan soo scodo ee ku aadan sharciyada gobolka CiHS ee hadda:

- Kiridhitka kulleejka waxaa lagu tirin karaa kiridhit maado xulasho ah haddii loo wareejiyo IHE kale.
- Waa mas'uuliyadda ardayga CiHS inuu codsado warqadda natiijada kulleejkiisa oo uu u geeyo IHE-ga qabanayo si uu u helo kiridhit wareejinta.

SPS waxay hadda is-afgarad kula jirtaa UW, North Seattle College, iyo Edmonds College, taasoo kordhinaysa marin-u-helka CIHS iyo fursadaha dugsiga sare kadib ah ee ardayda.

Si aad u hesho taariikhaha gaarka ah ee diiwaangelinta, wakhtiyada kama dambaysta ah, iyo hoysiinada ee CIHS, fadlan booqo:

- Edmonds College
- North Seattle College
- UW

### Deeqaha Kiridhitka Labaad

- Deeqda Diiwaangelinta Labaad waxa ay bixisaa fursado maalgelineed iyada oo loo marayo Golaha Guulgaarista Ardayda Washington (WSAC) ee kulleejooyinka ka qaybqaadanaya. Barnaamijyada kiridhitka Labaad waxay ardayda u suurtagaliyaan in ay isku mar qaataan kiridhitka dugsiga sare iyo kiridhitka kulleejka.

### Khidmadaha Imtixaanka

- Maalgelinta gobolka ee kababka khidmadaha imtixaanka ee AP, IB, iyo CI meesha ayaa laga saaray labada sanad dugsiyeed ee 2025-27. Degmooyinka waxay bixin karaan taageero maxalli ah marki la heli karo, balse khidmadaha imtixaanaadka waxay hadda noqon kartaa masuuliyadda ardayga/qoyska ilaa kaalmo kale la bixiyo.
- Haddii barnaamijyada kabidda dib loo soo celiyo mustaqbalka, OSPI waxa ay bixin doontaa hagitaan iyo foomam cusub.

### Isla Bilaabida

- Isla Bilaabida waxay bixisaa ka dhaafitaanno khidmada ah oo ay ka bixiso kulleejyada kaqeybqaadanayo sida uu dhigayo RCW 28A.600.310.
- Ardayda uqalma waxay Isla Bilaabida iska diiwaangelin karaan xaafad kasta oo Washington ah iyo kulleejka farsamada, iyo sidoo kale koorsooyinka onlaynka ah ee IHE-yada kaqeybqaadanayo.
- Fursadaha teeramka saamarka ayaa loo hayaa ardayda uqalma, oo ay ku jiraan ardayda fasalka 10aad ama ardayda fasalka 11aad ee soo kacaya ee leh Celceliska Sanadlaha Waqtiga Buuxa ee u Dhigma (AAFTE) ee la heli karo.
- Dhibloomooyinka dugsiga sare ayaa laga yaabaa in ay kulleejyada siiyaan ardayda dhigata fasalka u dambeeya ee dugsiga sare ee uqalma sida hoos timaado RCW 28B.50.535.
- Ardayda ayaa mas'uul ka ah in ay codsadaan IHE-ga ay rabaan in ay dhigtaan, sida ku qeexan RCW 28A.600.320.

## Fursadaha Kudarsashada Kiridhitka Labaad

Ardaydu waxay kasban karaan kiridhityada dugsiga sare iyo kulleejka iyagoo u marayo koorsooyinka Kiridhitka Labadaad ee CTE, Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa, Isla Bilaabida, AP®, ama IB. Siyaasadaha wareejinta waa ay ku kala duwan yihiin kulleejyada, marka la xiriir machadka si aad uga hesho faahfaahino. Inta badan dugsiyada sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay bixiyaan ugu yaraan hal ikhtiyaar oo kiridhitka labaad ah. Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in ardayda kiridhitka labaad in ay u badan yihiin in ay ku qalin jabiyaan waqtigi loogu talagalay, ay helaan darajooyin sare, oo ay dhibco fiican ka keensadaan imtixaanaadka kulleejka.

### Meeleynta Sare

Koorsooyinka Meeleynta Sare (AP) waxay raacaan tilmaamaha Guddiga Kulleejka waxayna ardayda u diyaariyaan imtixaanka AP. Kiridhitka kulleejka waxaa lagu kasbadaa iyadoo la gaarayo dhibco gaar ah, taasoo ku kala duwan machadyada. Kulleejyada qaar waxaa laga yaabaa in ay xaddidaan aqbalaada kiridhitka AP. Khimado imtixaan ayaa la qaadaa. Kaalmada dhaqaale ee khidmadaha imtixaanka ayaa kala duwanaan kara iyadoo ay ku xiran tahay kheyraadka degmada; kababka khidmadaha imtixaanaadka ee gobolku uu maalgeliyo lama heli karo inta lagu jiro labada sanad dugsiyeed ee 2025-27. Qoysasku waa inay ka hubiyaan dugsigooda si ay uga helaan xulashooyinka taageerada hadda.

## Dugsiga Caalamiga ah

Koorsooyinka International Baccalaureate (IB) ayaa horseedi kara kiridhitka kulleejka iyadoo la galaayo imtixaano ama iyadoo la qaadanayo dhibloomada IB ama shahaadada xirfadda. Kiridhitka waxaa qoondeeya kulleejka, oo dhammeystirka dhibloomada waxaa lagu kasban karaa kiridhityo badan. Kulleejyada qaar waxay xaddidaan tirada kiridhityada IB ee la aqbalo. Khidmadaha imtixaanka ayaa laga yaabaa in laga dhaafo ardayda dakhliga hoose ee uqalma ee dhigata dugsiyada dadweynaha. Kababka khidmada ayaa la codsan karaa iyadoo la buuxinayo Foomka Xaqiijinta Dakhliga Hoose ee ku jira bogga webseedka Imtixaanka Ku Salaysan Kiridhitka Labaad ee OSPI.

Si aad u codsato kababka khidmada, Foomka Xaqiijinta Dakhliga Hoose ayaa laga heli karaa bogga webseedka Imtixaanka Ku Salaysan Kiridhitka Labaad ee OSPI.

## Kiridhitka Labadaad ee CTE

Barnaamijka Kiridhitka Labadaad ee Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada (CTE) waxa uu u oggolaanayaa ardayda dugsiga sare inay helaan kiridhitka kulleejka ee dhameystirka koorsooyinka CTE ee dugsiyada kaqeybgalaya. Waxa uu bixiyaa manhaj adag oo ardayda siiya xirfadaha tacliinta, farsamada, iyo goobta shaqada ee lagama maarmaanka ah, iyagoo u diyaariya inay ku guulaystaan xirfadahooda.

## Koorsooyinka Dugsiga Dhexe ee loogu talagalay Kiridhitka Dugsiga Sare

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay heli karaan kiridhitka dugsiga sare ee ah koorsooyinka dugsiga dhexe ee gaarka ah.

Fasalka qalain jabinaya 2024 iyo wixi ka dambeeyo, kiridhityada la helo inta ardaygu ku jiro fasalka toddobaad ama sideedaad waxaa lagu dari doonaa warqada natiijada dugsiga sare haddii aysan si kale u codsan ardayga iyo qoyska ardayga mooyee.

Ardayda ka qalin jabinaya fasalada kahor sanadka 2024, kiridhityada la helo inta ardaygu dhiganayey fasalka toddobaad ama sideedaad waxaa lagu dari doonaa warqada natiijada dugsiga sare marka ay codsadaan ardayga iyo qoyska ardayga.

Ardayda dhammeysay koorso kiridhit lagu qaadanayo oo dugsiga sare inta ay dhiganayeen dugsiga dhexe ee dugsi kale oo degmo waa inay keenaan warqada natiijada oo ka socota dugsiga degmada ee koorsada laga qaatay si loogu tixgeliyo oggolaanshaha maamulaha dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

## Kiridhitka Aqoonta Luuqadaha Adduunka

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa lagu abaalmarin karaa kiridhitka luuqada adduunka iyaga oo ku dhisayo aqoonta luuqad aan Af-Ingiriisi ahayn. Qiimeyntu waxay la jaan qaadi doontaa Golaha Mareykanka ee tilmaamaha aqoonta Waxbaridda Luqadaha Dibadda (ACTFL) si loo hubiyo joogteynta luqadaha oo dhan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, u tag lataliyaha iskuulkaaga ama bogga Qiimeynta Luqadaha Adduunka ka booqo www.seattleschools.org/world-languages

## Xulashada Koorsada Dugsiga Sare ee Onlaynka ah

Waxaa jira afar ikhtiyaar si ay ardayda u qaataan koorsooyinka onlaynka ah:

1. Iska Diiwaangeli Ikhtiyaarka Onlaynka ee Iskaashiga Waalidka Cascade.
2. Iska Diiwaangeli Akadeemiyada Intergency iyo qaadashada koorsooyinka onlaynka ah.
3. Qaado koorsooyinka onlaynka ah ee dib u kabista kiridhitka adiga oo u mataya bixiiyeyaasha dugsigaaga sare uu isticmaalayo.
4. Raac Siyaasada iyo Habraaca 2024 oo codso ikhtiyaarka qaadashada kiridhitka ka baxsan degmada.

## Xarunta Xirfadaha Seattle

Xarunta Xirfadaha Seattle waa xulasho maalin-gelinkeed oo dugsi sare ah taasoo bixisa koorsooyinka horumarsan ee Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada (CTE) oo ay ka bixiso dhowr goobood oo degmada ah. Ardayda waxay qaadan karaan koorsooyin horumarsan, oo loogu diyaargaroobayo CTE oo nis-gelin la dhigto inta lagu jiro sanad dugsiyeedka iyo noocyada horudhaca koorsooyinkaan iyo shaqo barashooyin ay ku kasbadaan kiridhitka CTE ee dugsiga sare xilliga xagaaga.

Ardayda aanan marinka u haysan dhammaan koorsooyinka ay u baahan yihiin inay dariiq qalin-jebin oo CTE ah ay ku dhammeystiraan dugsigooda sare waxay koorso ka dhammaystiri karaan Xarunta Xirfadaha, sida Xirfadaha Shaqo ee Waxbarashada, Hawlaha Maraakiibta Badda, ama Farshaxanka Warbaahinta. Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha waxay sidoo kale bixin kartaa kiridhitka kulleejka ee dugsiga sare lagu qaato iyo buundooyinka la midka ah si ay uga caawiyaan buuxinta shuruudaha kale ee qalin-jebinta, sida xisaabta, sayniska, ama PE.

Ardayda waxay bisha Janaayo codsan karaan koorsooyinka sanad dugsiyeedka ee Xarunta Xirfadaha, iyagoo caawimo ka helayo la-taliyeyaasha si loo go'aamiyo jadwal macquul ah iyo danaha. Koorsooyinka sanad dugsiyeedka ee Xarunta Xirfadaha waxaa loogu talagalay ardayda dhigata fasalada 11aad iyo 12aad, Koorsooyinka xagaaga ee Xarunta Xirfadaha waxaa loo heli karaa ardayda soo socota ee fasalada 9aad-12aad. Codsiga xagaaga wuxuu webseedkeena ka furmi doonaa Gu'ga 2026.

Si aad u hesho codsiyadeena iyo sharraxaadaha koorsooyinkeena booqo webseedkeena: https://skillscenter.seattleschools.org

## Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ee 2026-27

- **Wax Soo Saarista Horumarsan: Hawada Sare iyo Badda**
  Goobta: Rainier Beach High School
- **Tignoolajiyadda Baabuurta**
  Goobta: Dhismaha Xarunta Xirfadaha iyo West Seattle High School
- **Farsamooyinka Dhismaha**
  Goobta: Rainier Beach High School
- **Dabdeminta iyo Adeegyada Caafimaadka ee Degdegga ah**
  Goobta: Dhismaha Xarunta Xirfadaha
- **Caawinta Caafimaad**
  Goobta: Lincoln High School
- **Hawlaha Maraakiibta Badda**
  Goobta: Xarunta Doomaha Geedaha iyo Seattle Maritime Academy
- **Fanka Warbaahinta: Wax u Abuurista Baraha Bulshada**
  Goobta: Nova High School
- **Caawinta Kalkaalinta**
  Goobta: Franklin High School
- **Akademiyadda Wax Baridda/Xirfadaha Shaqo ee Waxbarashada**
  Goobta: Franklin High School
- **Nakhshadaynta Geemamka Fiidiyowga**
  Goobta: Nova High School

# Isku Xigitaanka Casharada Koorsada ee Lagu Taliyey

Bogagga soo socdo waxa ay ka kooban yihiin isku xigxiga koorsada lagu taliyay iyo xulashooyinka koorsada qaarkood, diyaargarowga, ama tusaalooyinka laga heli karo aag kasta oo tacliinta ah oo loo baahan yahay.

Fadlan kala xiriir iskuulkaaga wixi su'aala oo ku saabsan qeexitaanada koorsooyinka lasoo qoray iyo inaad ogaato xulashooyinka gaarka ah ee iskuulkaaga sare uu bixiyo. Macluumaad muhiim ah oo dheeraad ah waxaa laga heli karaa agabka diiwaangelinta ee uu iskuul kasto soo saaro.

Si wadajir ah loo isticmaalo, tani waxa ay kaa caawin doontaa inaad nakhshadeyso qorshe waxbarasho oo buuxin doona shuruudaha qalin jabinta oo kaa caawin doona inuu kuu diyaariyo qorshayaashaada dugsiga sare ka dib ah. Qorshahani waxaa loola jeedaa in lagu bixiyo waayo-aragnimo waxbarasho oo macno leh, ku habboon, oo shakhsi ahaaneed ee dugsiga sare oo dhan.

# Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE)

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Diyaargarowga Fasalada 6-12

### 9 Diyaargarow oo CTE ah:

1. Culuumta Beeraha
2. Ganacsiga iyo Suuqgeynta
3. Cuno karinta iyo Soo dhaweynta
4. Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha
5. Caafimaadka iyo Daawada
6. Tignoolajiyadda Macluumaadka
7. Fanka Warbaahinta
8. Ganacsiga Xirfada Leh
9. STEM

| | |
|---|---|
| FASALKA 7aad | CTE (hal simistar) |
| FASALKA 8aad | CTE (hal simistar) |
| FASALKA 9aad | Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo) |
| FASALKA 10aad | Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo) |
| FASALKA 11aad | Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Goobta Shaqa Barashada iyo Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo) |
| FASALKA 12aad | Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Goobta Shaqa Barashada iyo Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo). |

# Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE)

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga ama booqo [webseedka SPS CTE](#) si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan dariiqyada xirfadda shaqada. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Diyaargarowga Beeraha

### Sayniska Deegaanka AP 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7157, HCT7158
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo sayniska sanadka 3aad
**Muddada:** Labo simistar
**Kiridhitka Kulleejka:** Imtixaanka AP Ayaa La Bixiyaa

Koorsadani waxa ay ku lug leedahay barashada saynis ballaaran oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin cilmiga dhulka, bayoolajiga, daraasaadka deegaanka, kimistariga, saadaasha hawada, iyo juqraafiga iyo sidoo kale barashada nidaamyada dabiiciga ah. Ardayda waxay bartaan in ay aqoonsadaan oo ay falanqeeyaan dhibaatooyinka deegaanka, iyagoo qiimeynaya khataraha ay keeni karaan dhibaatooyinkaan oo baaraya xalal kale.

### Beer Falashada Deegaanka 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT8026, HCT8027
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo sayniska sanadka 3aad
**Muddada:** Labo simistar
**Kiridhitka Kulleejka:** South Seattle College

Koorsadani waxa ay ardayda siineysaa horudhaca maadada Beer Falashada Deegaanka. Ardayda waxay wax ka bartaan adeegsiga iyo badbaadada qalabka beer falashada, naqshadeynta teendhada wax abuuro, iyo aqoonsiga dhirta. Xiriirka ciidda iyo biyaha iyo dhirta ayaa la daraaseeyaa, waxaana la soo bandhigaa naqshadeynta ubaxa. Iyadoo loo marayo beerashada dalagyada, ardayda waxay bartaan xannaanada saxda ah ee dhirta, beerista dhirta, hawlaha iyo agabka guud ee aqalka teendhada dhirta lagu koriyo. Marka dalaga uu diyaar u yahay in la iibiyo, ardaydu waxay bartaan inay noqdaan ganacsato iyagoo baranaya suuq-geynta, farsamooyinka iibka, iyo bandhigyada badeecada.

### Culuumta Badda 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6065, HCT6066
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo sayniska sanadka 3aad
**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waa barashada muuqaal-dhismeedka jireed iyo juqraafiga culuumta badda iyo sida ay u falgalaan. Mawduucyada lagu qaato waxaa kamid ah kimistiriga biyaha badda, fiisikiska qaababka hirarka iyo mowjadaha, cilmiga dhulka ee sagxada badda iyo muuqaalka dhulka, iyo baayolajiga badda.

### Sayniska Dhirta 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT5966, HCT5967
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo sayniska sanadka 3aad
**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay ku lug leedahay barashada mabaadii'da sayniseed ee hoos yimaada tarmidda xoolaha, beer falashada, habeynta wax soo saarka, iyo qeybinta wax soo saarka beeraha iyo dhirta. Ardaydu waxa ay ka qayb qaadan doonaan waayo-aragnimada beeraha oo la kormeerayo halkaas oo ay ka baran doonaan dhaqanka barashada hal-abuurka ganacsiga suuq-geynta, farsamooyinka iib-geynta, iyo bandhigyada alaabta.

## Diyaargarowga Ganacsiga iyo Suuqgeynta

### Xisaabaadka 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7131, HCT7132
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE
**Muddada:** Labo simistar
**Kiridhitka Kulleejka:** North Seattle College

Ardaydu waxa ay yeelan doonaan xirfado lagu bilaabayo fahamka qeybaha aasaasiga ah iyo fikradaha nidaamyada xisaabaadka laba-gelinta ah ee la xiriira ganacsiyada adeegga ee loo habeeyey sidii keli-lahaanshaha. Xirfadaha waxaa kamid ah fahmidda isla'egyada xisaabinta, falanqeynta iibabka ganacsiga, gelinta joornaalada ee wax kala iibsiga, gelinta buugaagta xisaabta maaliyadda, nidaamyada maamulidda lacagta caddaanka ah, xaashiyaha shaqada, iyo bayaannada maaliyadeed, iyo diyaarinta xisaab xirka.

### Dhaqaalaha Guud ee AP 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2528, HCT2529
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE
**Muddada:** Labo simistar
**Kiridhitka Kulleejka:** Imtixaanka AP Ayaa La Bixiyaa

Dhaqaalaha Guud ee AP waa koorso heer-kulleej ah oo loogu talagalay in ay ardayda siiso faham horumarsan oo ku aadan mabaadii'da dhaqaalaha iyo sida mabaadi'daas ay ugu shaqeeyaan nidaamka dhaqaalaha guud ahaan. Koorsadu waxa ay isku dhaftaa doorka dawladda ee ku aadan kor u qaadista waxtarka iyo sinnaanta dhaqaalaha.

## Maareynta Ganacsiga A & B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT4295, HCT4296

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** North Seattle College

Koorsadu waxa ay bixisaa macluumaadka udub dhexaadka ah ee lagu dabaqi karo dhammaan dhinacyada ganacsiga waxayna ka kooban tahay adeegsiyada baraatikada ah ee aragtida maareynta. Ardayda waxaa loo soo bandhigi doonaa hawlaha maareynta ee aasaaska ah oo ay ku jiraan qorsheynta, abaabulka, hogaaminta, iyo xakameynta oo ka imanaya dhinacyo badan. Iyadoo ay ku jirto in tignoolajiyadda iyo isgaarsiinta loo adeegsado sidi aalado ganacsi, koorsadani waxaa lagu qaabeeyay hab ku salaysan xirfado.

## Hal-abuurka Ganacsiga

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2291

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

Koorsooyinka hal-abuurka ganacsiga waxa ay ardayda siiyaan horudhaca cilmiga iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah in ay yeeshaan oo ay maamulaan ganacsiyadooda. Mowduucyo ka kala socda aagag badan ayaa caadiyan ay ka kooban tahay koorsadu: dhaqaalaha, mabaadi'da suuq-geynta, cilaaqaadka aadanaha iyo cilmi-nafsiga, ganacsiga iyo sharciga shaqada, xuquuqda sharciga iyo mas'uuliyadaha lahaanshaha, ganacsiga iyo qorsheynta maaliyadeed, maaliyadda iyo xisaabaadka, iyo isgaarsiinta.

## Suuq-geynta 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT5077, HCT5078

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** North Seattle College

Koorsadani waxa ay si cad u qeexi doontaa fikradda suuq-geynta waxayna ardayda ku hoggaamin doontaa dariiqa shaqo ee waxbarashada suuq-geynta. Ardayda waxay heli karaan fursad ay kaga qaybgalaan oo ay ku tartamaan tartamada iyo hawlaha DECA. Kiridhitka Labadaad ee CTE (kiridhitka kulleejka) waxaa laga heli karaa Kulleejyada Seattle ee ardayda dhammaysata taxanaha koorsadan. Ardayda fasallada ku bogta buundada "B" ama ka sare ayaa uqalma kiridhitka labaad.

## Maareynta Mashruuca

**Koodhadhka Koorsada:** HCT4361

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

Fasalkani waa hordhaca Maareynta Mashruuca ee Ururada Casriga ah. Waxaa kamid ah doorka maareeyaha mashruuca dabeecadaha iyo sifooyinka maareeyayaasha mashruuca guulaysta; iyo caqabadaha kajira maareynta mashaariicda ee deegaanka dhaqamada kala duwan leh, ee caalamiga ah.

# Diyaargarowga Cuno karinta iyo Soo dhaweynta

## Dubidda iyo Cajiinka

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2457

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waa horudhaca farshaxanka cuno karinta taasoo diiradda saarta dubidda aasaasiga ah iyo xirfadaha cajiinka. Baro in aad samayso oo aad saxanka ku safto cuntada macaan, macmacaanka, rootiga, rootiga degdegga ah Ku tijaabi shukulaato iyo macmacaanka kale adigoo isla markaana dhisaya xirfadaha xisaabta ee aasaasiga ah sida cabbiraadda iyo beddelka cuntooyinka. Ardayda waxay bartaan xirfadaha badbaadada iyo fayadhowrka aasaasiga ah inta jikada lagu jiro oo sidoo kale waxay horumariyaan xirfadaha adeegga cuntada iyo suuq-geynta.

## Farshaxanka Cunnada 1A-2B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6061, HCT6062, HCT6063, HCT6064

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** Ilaa 2.0 CTE iyo sayniska sanadka 3aad; 0.5 buundo simistar kastaba

**Kiridhitka Kulleejka:** South Seattle College

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxaa lagu qaataa aragtida iyo ku dhaqanka mabaadi'da cunto karinta, ereybixinta, horumarinta cuntada, waxyaabaha cuntada lagu daro, qalabka, badbaadada, iyo horumarinta xirfada shaqada. Xirfadaha waaxdan waxa ay ku hagaan shaqooyinka cunto karinta, soodhaweynta, iyo adeegga cuntada. Sanadka labaad ee labada sano ee isku xiga waxa ay ardayda u diyaarisaa in ay galaan shaqooyinka cunto karinta, adeegga cuntada, iyo soodhaweynta. Koorsadani waxa ay bixisaa cunto diyaarin horumarsan iyo xirfadaha soo bandhigga. Kiridhitka Labadaad ee CTE (kiridhitka kulleejka) waxaa laga heli karaa Kulleejyada Seattle ee ardayda dhammaysata taxanaha koorsadan.

## Sayniska Cuntada 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7027, HCT7028

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo sayniska sanadka 3aad

**Muddada:** Labo simistar

Maadada Sayniska Cuntada, ardaydu waxa ay bartaan cilmiga, xirfadaha, iyo dhaqamada looga baahan yahay shaqooyinka sayniska cuntada, cuntada diyaarsan, iyo nafaqada. Koorsadu waxa ay diiradda saareysaa cilaaqaadka ka dhexeeya wax soo saarka cuntada iyo isticmaalka, caafimaadka, iyo horumarka aadanaha.

## Nafaqada iyo Badqabka

**Koodhadhka Koorsada:** HCT4349

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani ardayda waxay ku bartaan sida loo gaaro go'aamada la xiriira cunto caafimaad qabta oo xog ogaal ah oo gacan ka geysta badqabka inta ay nool yihiin. Qaadashada hab dhammaystiran, koorsadani waxay ka hadashaa dhammaan dhinacyada laga bilaabo xulashada iyo diyaarinta cuntooyin kala duwan oo horseedaya qorsheyn cunto taxaddar leh. Ardaydu waxa ay bartaan farsamooyinka cunto karinta ee aasaasiga ah iyo badbaadada/fayodhowrka jikada dhexdeeda ah.

# Diyaargarowga Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha

## Lebiska iyo Dharka 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6076, HCT6077

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Farshaxanka Sawiraanta

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay adeegsataa mashaariicda lagu dabaqo naqshadeynta iyo dhismaha, tignoolajiyadda, mishiinada, dharka, iyo fikradaha lagu abuurayo badeecadaha dharka. Adeegsiyada waxaa ku jira naqshadeynta masraxa iyo lebiska, dib-u-warshadeynta iyo dib-u-naqshadeynta, dhismayaasha suuqa weyn, dad gaar ah, iyo sidoo kale dharka gaarka ah iyo qoyska, alaabta guriga iyo dayactirka.

## Xirfadaha Shaqo ee Waxbarashada

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6070, HCT6071

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay ardayda horudhac ka siisaa xirfad shaqo oo lagu baranayo aqoonta, xirfadaha, iyo waayo-aragnimada baraatikada ah ee fasalka dhexdiisa. Ardaydu waxa ay indha-indheeyaan farsamooyinka aasaasiga ah ee wax barista, oo ay ku jiraan maareynta fasalka iyo waqtiga, barashada qaabab iyo xeelado kala duwan oo waxbarid, qorsheynta manhajka iyo waxqabadyada heerka fasalka, oo la falgalka ardayda da'aha kala duwan ee fasalka iyo goobaha dugsiga.

## Waalidnimada Korinta Carruurta

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2430

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** North Seattle College

Korinta Carruurta waxaa loogu talagalay in ay ardayda ka caawiso horumarinta xirfadaha iyo dabeecadaha ku habboon la shaqeynta iyo la noolaanshaha carruurta. Aagaga wax laga baranayo waxaa kamid ah garaadka, bulshonimada, shucuurta, iyo koritaanka noolaha ee carruurta, cilaaqaadka waalidka iyo carruurta; dhaqamada waalidnimada; baahiyaha gaarka ah ee carruurta; saameynta waalidka iyo deegaanka ee ay ku leeyihiin korriinka carruurta; iyo nidaamyada taageerada dibadda ah.

## Caafimaadka Qoyska

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7004

**Fasalada:** 9

**Buundada:** 0.5 CTE iyo Caafimaad

**Muddada:** Hal simistar

Caafimaadka Qoyska waxaa loogu talagalay in ardayda uu u diyaariyo mashaakil xallin nolosha oo dhan ah, hab fikirka qotoda dheer, iyo xirfadaha maareynta ee la xiriira arrimaha caafimaadka iyo badqabka ee saameynaya qoysaska. Yoolka aasaasiga ah waa in ardayda loo awood siiyo in ay hab nololeed caafimaad leh u horumariyaan naftooda iyo dadka kaleba iyaga oo diiradda saaraya dookhyada caafimaadka leh iyo ku noolaanshaha nolol wax soo saar leh, oo lagu qanco.

## Horumarka Aadanaha

**Koodhadhka Koorsada:** HCT5484

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay daraaseysaa mabaadii'da horumarinta cimriga nolosha laga bilaabo dhalashada ilaa geerida. Koorsadani waxa ay wax ka soo qaadataa dhinacyo kala duwan oo ay ku jiraan cilmi-nafsiga, cilmiga bulshada, cilaaqaadka aadanaha, horumarinta aadanaha, iyo daraasaadka qoyska. Waxaa fasalka ku jira fursado lagu sahmiyo xirfadaha shaqada.

## Nolosha Madaxa Banaan

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2429

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay ardayda u diyaarineysaa mas'uuliyadaha, xirfadaha nolosha, iyo madax-bannaanida oo ay ku jiro mawduuc la xiriira dhaqaalaha, cuntooyinka, badqabka, cilaaqaadka, guriyeynta, gaadiidka, iyo qorsheynta shaqada.

## Cilaaqaadka Dadka Ka Dhexeeya

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7006

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE iyo Caafimaad

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay diiradda saartaa cilaaqaadyada dadka ka dhexeeya ee dookhyada caafimaadka leh iyo nolol wax soosaar lagu qanco leh iyada oo loo marayo barashada cilmi-nafsiga bulshada, cilmi-nafsiga dhaqanka, iyo Cilmi-nafsiga Caafimaadka. Xirfadaha wada-xiriirka, xirfadaha go'aan gaarista iyo xirfadaha wax diidista ayaa lagu dabaqaa dhammaan cutubyada la barto.

## Cilmi-nafsiga 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT4908, HCT4909
**Fasalada:** 9-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo Cilmiga Bulshada
**Muddada:** Labo simistar

Ardaydu waxa ay bartaan habdhaqanka aadanaha iyada oo loo marayo hababka dugsiyada kala duwan ee hab-fikirka cilmi-nafsiga. Mowduucyada la indha-indheeyo waxaa kamid ah dhinacyada sida dareemista, aragtida, xaaladaha miyir-qabka, xusuusta, fikirka iyo garaadka, aragtida shakhsi ahaaneed, barashada, garashada hab u fkirka, aragtida maskaxda, cilladaha maskaxda, iyo cilmi-nafsiga bulshada.

# Diyaargarowga Sayniska Caafimaadka iyo Dawada

## Baayolojiga Moolkiyuulka La Dabaqo Maamuuska A & B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT3140, HCT3141
**Fasalada:** 10-12
**Buundada:** 1.0 CTE
**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay diiradda saareysaa adeegsiga baayolojiga moolkiyuulka iyo farsamooyinka sheybaarka moolkiyuulka ee guud ilaa mowduucyada hadda ee dawada iyo cilmi-baarista dawada noolaha. Mowduucyada gaarka ah ee koorsadan waxaa kamid ah farsamooyinka sheybaarka, baayolojiga moolkiyuulka, injineerinka hide-sidaha, cudurada faafa, tijaabinta hidaha, iyo sahminta baayolojiga kansarka.

## Sayniska Dawada Noolaha 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT3136, HCT3137
**Fasalada:** 10-12
**Buundada:** 1.0 CTE
**Muddada:** Labo simistar

Koorsadan dhexdeeda ardaydu waxa ay adeegsadaan cilmi-baaris si ay u daraaseeyaan qodobada la xiriira dawada, nidaamyada jirka, iyo xaaladaha caafimaadka. Ardaydu waxa ay indha-indheeyaan dookhyada hab nololeedka iyo daaweynta caafimaad ee dheereyn karta cimriga nolosha. Fikradaha muhiimka ah ee noolaha waxaa ka mid ah hababka is-xakameynta nidaamyada noolaha, dheef-shiidka kiimikaad, dhaxlidda sifooyinka, nidaamyada jawaab-celinta, iyo cudurada.

## Baayolojiga Tignoolajiyadda Noolaha 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6057, HCT6058
**Fasalada:** 10-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo Bayoolaji ama Sayniska Shaybaarka
**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxaa kamid ah diirad saarista nidaamyada walxaha, tamarta, iyo macluumaadka ku kala beddela cabbiro badan. Cutub kasta waxaa lagu saleeyey ifafaale ay ardaydu uga shaqeeyaan in ay ku sharraxaan iyaga oo adeegsanaya caddeymaha ay ka ururiyaan cutubka oo dhan. Ardaydu waxa ay sameyn doonaan indha-indheyn waxa ayna heli doonaan oo ay qiimeyn ku sameyn doonaan macluumaadka si ay u soo ururiyaan caddeyn, waxa ay falanqeyn ku sameyn doonaan oo ay tarjumi doonaan caddeyntaas si ay macno u sameeyaan waxa ay baranayaan waxayna ku lug yeelan doonaan dood iyada oo loo marayo hadal ahaan koox gaar ah iyo guud ahaan fasalka si ay isugu yimaadaan is-afgarad ku saabsan fikradaha lagu sahmiyay cashar kasta.

## Hide-sidaha Tignoolajiyadda Noolaha 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6059, HCT6060
**Fasalada:** 10-12
**Buundada:** 1.0 CTE iyo Sayniska Shaybaarka sanadka 3aad
**Muddada:** Labo simistar
**Kiridhitka Kulleejka:** Shoreline College

Koorsadani waxa ay diiradda saareysaa adeegsiga sayniska noolaha, kimistiriga noolaha, iyo hide-sidaha oo loo adeegsado daryeelka caafimaadka. Waxaa ku jira tilmaamaha xogta noolaha, aqoonsiga hide-sidaha, kimistiriga noolaha, isku xijinta DNA-da, injineernimada hide-sidaha, baayolojiga noolaha ee warshadeed, horumarinta dawada iyo hab-nololeedka, sharciga lahaanshaha, maareynta tignoolajiyadda noolaha, suuq-geynta, iyo anshaxa.

## Kaaliyaha Daryeelka Guriga

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6069
**Fasalada:** 10-12
**Buundada:** 0.5 CTE
**Muddada:** Hal simistar

Fasalkani waxaa loogu talagalay inuu ardayda u diyaariyo shaqada marka ay ka gudbaan imtixaanka shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee gobolka kaasoo leh xirfadaha heerka gelitaanka ee lagama maarmaanka u ah kaaliyaha daryeelka guriga si uu uga caawiyo macaamiisha hawlaha nolol maalmeedka.

## Dawada Isboortiga IB A-D

**Koodhadhka Koorsada:** HCT9657, HCT9658, HCT9665, HCT9666
**Fasalada:** 10-12
**Kiridhit:** ilaa 2.0 CTE iyo Sayniska; 0.5 kiridhit simistar kastaba
**Kiridhitka Kulleejka:** Imtixaanka IB Ayaa La Bixiyaa

Koorsadani waxa ay ka kooban tahay hab-dhismeedka jirka iyo cilmi-nafsiga, makaanikada noolaha, iyo nafaqada oo ah waaqaca isboortiga, jimicsiga, iyo caafimaadka. Qiimeynta dhaawaca iyo kahortagga iyo sidoo kale xirfadaha baxnaaninta ayaa lagu bartaa. Inta lagu jiro sanadka labaad ee koorsadan, ardaydu waxa ay sameyn doonaan baaritaano baraatiko ah (tijaabo), oo fursad u siinaya in ay kasbadaan cilmiga iyo fahamka lagama maarmaanka u ah dabaqista mabaadii'da sayniska oo ay si qota dheer u falanqeeyaan waxqabadka aadanaha.

## Horudhaca Xirfadaha Shaqada Dawada

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7123

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** Highline College

Koorsadani waxa ay diiradda saartaa cilaaqaadyada dadka ka dhexeeya ee sahminta xirfadda shaqada iyo xirfadaha aasaasiga ah ee lagama maarmaanka u ah xirfadda goobta daryeelka caafimaadka. Mowduucyada waxaa kamid ah Taariikhda iyo Isbed-beddelada Daryeelka Caafimaadka, Tayada Shakhsiyeed iyo Xirfadeed ee Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka, Mas'uuliyadaha Sharciga iyo Anshaxa, Daryeelka Xaalada Degdegga ah, Xakemaynta Caabuqa, Xisaabta Dawada, Badqabka iyo Nafaqada, Xaaladda Macmiilka iyo Eray Bixinta Caafimaadka.

## Barashada Shaqada Jirka A & B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT3138, HCT3139

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Sayniska sanadka 3aad

**Muddada:** Labo simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** Highline College

Ardayda waxaa loo soo bandhigaa cilaaqaadka ka dhexeeya qaab-dhismeedka iyo shaqada jirka dhexdiisa ee 11-ka nidaam ee asaasiga ah ee xubnaha jirka, iyo sidoo kale cilladaha iyo xanuunada. Koorsadu waxa ay ka kooban tahay sahanka xirfadaha shaqada ee dawada cilmiga noolaha.

## Caafimaadka Dadweynaha

**Koodhadhka Koorsada:** HCT5968

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** 0.5 CTE

**Muddada:** Hal simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** Highline College

Koorsadan dhexdeeda, ardayda waxaa laga codsan doonaa in ay dabaqaan fahamkooda labaduba baayolojiga il-ma-aragtada iyo shaqada jirka aadanaha iyo sidoo kale xaaladaha bulsheed iyo dhaqameed ee ku xeeran sinnaanta iyo helitaanka nidaamka daryeelka caafimaadka si loo fahmo loona sahamiyo nidaamka caafimaadka bulshadeena. Kiridhitka Labadaad ee CTE (kiridhitka kulleejka) waxaa loo heli karaa ardayda qaata fasalkan.

## Dawada Nidaamyada A & B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT5981, HCT5982

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Sayniska sanadka 3aad

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay diiradda saareysaa hagaajinta badqabka shakhsiga iyo aqoonsiga fursadaha ugu horreeya ee lagu beddelo ama xitaa looga hortago cudurka. Koorsadani waxa ay diiradda saari doontaa dhisidda iyo qoto-dheeraynta xirfadaha anshaxa dadka kadhexeeya, nidaamyada fikirka, iyo u doodista uu garwadeenka ka yahay bukaanka si wax looga barto loona sahmiyo xirfadaha shaqada iyo kaqeybgalka nidaamyada caafimaadka iyo dawada ee bulshooyinkeena.

# Diyaargarowga Tignoolajiyadda Macluumaadka

## Sayniska Kombiyuutarka AP A1 & A2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7727, HCT7728

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Xisaabta Sanadka 3aad

**Muddada:** Labo simistar

**Shuruudaha Kahorreeya:** Mabaadii'da AP CS, Dhexgalka Warbaahinta, Horudhaca Borogaraaminta

**Kiridhitka Kulleejka:** Imtixaanka AP Ayaa La Bixiyaa

Koorsadan taxanaha ah ee horumarsan waxa ay dabooleysaa fikradaha aasaasiga ah ee borogaraaminta, oo ay ku jiraan borogaraaminta habraaca leh, koontaroolka qaab-dhismeedyada ee aasaasiga ah, boroseesgareynta faylka, safafka iyo horudhaca qeexitaanka walxaha.

## Mabaadii'da Sayniska Kombiyuutarka AP 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT4104, HCT4105

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Xisaabta Sanadka 3aad

**Muddada:** Labo simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** Imtixaanka AP Ayaa La Bixiyaa

Koorsadan taxanaha ah ee horumarsan waxa ay ardayda siineysaa horudhaca aag ballaaran oo sayniska kombiyuutarka ah. Ardaydu waxa ay bartaan in ay naqshadeeyaan oo ay qiimeeyaan xalalka iyo in ay sayniska kombiyuutarka ku dabaqaan in ay ku xalliyaan mashaakilka iyaga oo u maraya horumarinta algooridimka iyo barnaamijyada.

## Dhexgalka Warbaahinta A & B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6078, HCT6079

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Farshaxanka Sawiraanta

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay ardayda u soo bandhigeysaa fikrado heersare ah oo sayniska kombiyuutarka ah iyo habab naqshadeyn hal abuur leh iyagoo isla markaana baranaya sida loo adeegsado tignoolajiyadaha dhexgalka leh. Ardaydu waxa ay baran doonaan aragtida naqshadeynta badeecadaha, fikradaha borogaraaminta iyo xirfadaha maareynta badeecadaha iyagoo isla markaana adeegsanaya softiweer u gaar ah badeecada si ay u abuuraan mashaariic yaryar.

## Diyaargarowga Farshaxanka Warbaahinta

### Naqshadeynta Sawireed Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2543, HCT2544

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Farshaxanka Sawiraanta

**Muddada:** Labo simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** Highline College

Ardayda waxay bartaan sida si hal-abuur leh oo wax ku ool ah wax loogu gudbiyo sawirada dhijitaalka ah. Ardaydu waxa ay fahmi doonaan labadaba aaladaha dhaqameed iyo kuwa dhijitaalka ah waxa ayna baran doonaan xirfadaha naqshadeynta sawireed, softiweerka, iyo heerarka qeybta shaqada. Kiridhitka Labadaad ee CTE (kiridhitka kulleejka) waxaa loo heli karaa ardayda dhammaysa taxanaha koorsadan.

### Sawir Qaadista Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2536, HCT2537

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Farshaxanka Sawiraanta

**Muddada:** Labo simistar

Koorsooyinka sawir qaadista waxaa loogu talagalay inay u sahmiyaan sawir qaadista sidi hab wada-xiriir muuqaal ah oo hal-abuur leh. Ardayda dhigata koorsadan waxa ay bartaan hawlgallada kaamirada ee aasaasiga ah iyo mabaadii'da sawir-qaadista sida sawir isku aadinta, iftiin ku furista, qaabka istaagista, iyo wax ka beddelidda.

### Fiidiyowga Bilawga & Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2452, HCT2453, HCT2454, HCT2455

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Farshaxanka Sawiraanta

**Muddada:** Labo simistar

**Kiridhitka Kulleejka:** Shoreline College

Koorsadani waxa ay bartaa aasaaska sida si hal-abuur leh oo wax ku ool ah wax lagula xiriiro sheekooyinka muuqaalka ah iyada oo lagu eegayo shaashada kamarada fiidiyowga, oo ay ku jirto falanqeynta warbaahinta muhiimka ah. Ardayda ayaa iskaashada inta ay baranayaan habka fiidiyow soosaarista: soosaarista kahor (qorsheynta, fikrado la imaanshaha, iyo aqoonsiga kheyraadka), soosaarista (iftiin ku furista, isku aadinta, iyo farsamooyinka cod duubista), iyo soosaarista kadib (ku tafatirka sawirada, codka, iyo wax ka beddelka muuqashada).

## Diyaargarowga Ganacsiga Xirfada Leh

### Tababarka Hore ee Dhismaha 1A-2C

**Koodhadhka Koorsada:** HCT4485, HCT4486, HCT4487, HCT4488, HCT4489, HCT4490

**Fasalka:** 12

**Buundada:** 3.0 CTE, ilaa 1.0 la'eg Sayniska iyo Xisaabta

**Muddada:** Laba simistar (koorso maalin barkeed ah)

**Kiridhitka Kulleejka:** South Seattle College, Highline College

Koorsadan Ganacsiga Xirfada Leh ee Horumarsan waxay ardayda siisaa horudhaca agabka dhismaha, qalabka, iyo hababka iyadoo xoogga saaraysa fikradaha hoos yimaada ee xisaabta iyo sayniska. Ardaydu waxay nakhshadayn doontaa oo ay dhisi doontaa waxqabadyada alwaaxa, biraha, iyo qalabka kale ee dhismaha. Ardaydu waxay kasban kartaa shahaadooyin laga aqoonsan yahay aagga shaqada, OSHA10, Hawlwadeenka Forklift, Gargaarka 1aad/CPR/AED, iyo Calaamad-sidaha Taraafikada. Koorsadan waxaa aasaasi ahaan loogu talagalay inay u adeegto ardayda fasalka u dambeeya dhigata ee doonaya tababarada Xirfadaha Dhismaha marka ay qalin-jebiyaan.

### Nijaarnimada Deegaanka 1A & 1B

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6893, HCT6894, HCT6895, HCT6896

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE iyo Joomatari

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay shakhsiyaadka u diyaarisaa in ay dabaqaan aqoonta farsamada iyo xirfadaha lagu dhigo, lagu jaro, lagu dhiso, lagu taago, lagu rakibo, laguna dayactiro qaab-dhismeedyada geedaha laga sameeyo iyo qalabka lagu dhajiyo, iyadoo la deegsanayo gacmaha iyo aaladaha korontada. Waxaa kamid ah tilmaamaha xagga xisaabta farsamada, qaabeynta fareemka, qalabka dhismaha iyo xulashada, qiyaasidda shaqada, akhrinta naqshadeynta, aasaaska iyo dhul dhigga, dhammeystirka farsamooyinka nijaarnimada, iyo xeerarka iyo heerarka lagu dabaqi karo.

### Geedaha Dhismaha 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT7963, HCT7964

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

Fasalkan horudhaca ah ee ka shaqeynta geedaha dhismaha waxay siisaa ardayda fursad ay kula shaqeeyaan qaar badan oo ka mid ah qalabka, agabka, iyo hababka caadiga ah ee ka shaqeynta geedaha iyo geedaha dhismaha.

## Diyaargarowga Injineerinka STEM

### Elektarooniga Dhijitaalka ah TI 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT1575, HCT2315

**Fasalada:** 10-12

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

**Shuruudaha Kahorreeya:** Horudhaca Naqshadeynta Injineerinka

**Kiridhitka Kulleejka:** North Seattle College

Koorsadani waxa ay ardayda u soo bandhigeysaa wareegyada dhijitaalka ah ee laga helo geemamka fiidiyowga ah, saacadaha, kalkuleetarada, kamaradaha dhijitaalka ah, iyo kumanaan qalab oo kale. Ardaydu waxa ay baran doonaan adeegsiga dhijitaal loojig iyo sida aaladaha dhijitaalka ah loogu adeegsado in lagu maamulo qalabka otomaatigga ah.

### Horudhaca Naqshadeynta Injineerinka 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT6098, HCT6099

**Fasalada:** 9-11

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadu waxa ay ardayda ku horumarisaa xirfadaha mashaakil xallinta, iyadoo xoogga la saarayo soosaarista qaababka adkeyaasha saddex geesoolaha ah. Ardaydu waxa ay ka shaqeyn doonaan laga bilaabo sawirista feegaarka ee qaababka joomitiriga ah ilaa adeegsiga qaabeynta adag ee softiweerka kombiyuutarka. Waxa ay baran doonaan habka naqshadeynta mashaakil xallinta iyo sida loogu adeegsado waaxda shaqada in lagu soo saaro badeeco.

### Mabaadii'da Injineerinka 1 & 2

**Koodhadhka Koorsada:** HCT1576, HCT2311

**Fasalada:** 11-12

**Buundada:** 1.0 CTE

**Muddada:** Labo simistar

**Shuruudaha Kahorreeya:** Horudhaca Naqshadeynta Injineerinka & Elektarooniga Dhijitaalka Ah

Koorsadani waxa ay ardayda ka gacansiisaa fahamka aagga injineerinka iyo tignoolajiyadda injineerinka iyo fursadaha shaqo ee ay leedahay. Waxay sahamin doonaan nidaamyo injineerin oo kala duwan iyo hababka wax soo saarka. Waxa ay sidoo kale baran doonaan sida injineeryaasha ay wax uga qabtaan walaacyada ku saabsan cawaaqibta bulsho iyo siyaasadeed ee isbeddelka tignoolajiyadda.

## Koorsooyinka Shaqo Barashada

### Mihnadda Degdegga ah ee Career Quest

**Koodhka Koorsada:** Fadlan xaqiiji koodhka koorsada si aad u hesho khibradaha gaarka ah

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** .25 CTE ama maadada ikhtiyaarka ah

**Muddada:** 2 toddobaad oo maalmo oo buuxa

Mihnadaha Degdegga ah waa shaqo barashooyin yaryar oo lala kaashado la-hawlgalayaasha aagga shaqada. Ardayda waxay koox kala shaqaysaa Khuburada Aagga Shaqada iyo macalin fasal. Ardayda waxay bartaan xirfadaha shaqaalaysiinta iyo xirfadaha gaarka u ah aagga shaqada inta lagu jiro barnaamij xooggan oo 2-toddobaad oo buuxa ah. La-hawlgalayaashi hore ee aagga shaqada waxay ku dareen Amazon Future Engineer iyo Allen Institute.

### Koorsada Shaqo Barasho Raadinta

**Koodhadhka Koorsada:** HCT1294

**Fasalada:** 10-12 (Ardaydu waa in ay 16 sano jir yihiin ama kaweyn yihiin)

**Buundada:** 0.5 CTE ama Maadada ikhtiyaarka ah

**Muddada:** 1 simistar ama Xagaa

Raadinta Xirfadda waa koorso shaqo barasho halkaas oo ay ardaydu kula falgalaan ganacsiyada maxaliga ah si ay uga helaan waayo-aragnimada waxbarasho ee goobta shaqada oo macna ugu fadhida oo la jaan qaadaysa danaha dariiqooda shaqada. Ardayda shaqo barashada ku jirta waxa ay ku qaadan doonaan ugu yaraan 65 saacadood goobta, iyo 25 saacadood goobta fasalka. Arday kasta oo shaqo barashada ku jira waxa uu heli doonaa aragti ku saabsan fursadaha shaqo ee warshadaha maxalliga ah iyo sidoo kale helitaanka xirfadaha farsamada ee loo baahan yahay in loogu guuleysto dariiqyada oo dhan.

### Khibradda Barashada Shaqo Barasho Raadinta Goobta Shaqada

**Koodhadhka Koorsada:** Fadlan iskuulkaaga ka hubi koodhka koorsada Barashada Goobta Shaqada

**Fasalada:** 10-12 (Ardaydu waa in ay 16 sano jir yihiin ama kaweyn yihiin)

**Buundada:** 0.5 CTE muddo 180 saacadood ah

**Muddada:** 1 ama 2 simistar

**Shuruudaha Kahorreeya:** Ardaygu waa inuu sifo sharci ah oo faa'iido leh loo shaqaaleysiiyaa

Waxbaad baran kartaa adigoo lacag qaadanaya! Si aad looga qeybqaadato koorsadan ardaydu waa inay qaateen ugu yaraan hal koorso oo CTE ah oo u qalma oo la jaan qaadaysa yoolalkooda xirfadda shaqo. Ardaydu waa in ay la kulmaan Isku Dubaridahooda Xirfadda Barashada Ku Xiran si ay u dhammeystiraan iska-diiwaangelinta koorsada iyo ogolaanshaha waraaqaha ka hor inta aanay bilaabin khibradooda shaqo barasho.

# Af-Ingiriisiga Faniga Luuqada

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12

| Fasalka | Koorsada |
| --- | --- |
| FASALKA 6aad | Faniga Luuqada 6 |
| FASALKA 7aad | Faniga Luuqada 7 |
| FASALKA 8aad | Faniga Luuqada 8 |
| FASALKA 9aad | LGBTQIA Horudhaca Suugaanta iyo Curiska 9 |
| FASALKA 10aad | Suugaanta Adduunka iyo Curiska |
| FASALKA 11aad | Daraasaadka Qowmiyaadka, Afrikaanka Maraykanka, Aasiyaanka Maraykanka, Laatiinka Maraykanka, Dhaladka Maraykanka -ama- LGBTQIA Maraykanka ee Suugaanta & Curiska 11 |
| FASALKA 12aad | Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12, Suugaanta iyo Curiska AP, Luuqadda iyo Curiska AP, Luuqada iyo Curiska IB ee loogu talagalay fasalka 12aad, -ama- Running Start, Bridge to College English, Af-Ingiriisiga Kulleejka Lagu Dhigto Dugsiga Sare |

# Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Horudhaca Suugaanta iyo Curiska 9

**Koodhadhka Koorsada:** HLA3093, HLA3095

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Horudhaca Suugaanta iyo Curiska 9 ayaa xoogga lagu saaraa mawduucyada aqoonsiga iyo isa-soosaarista iyada oo loo marayo akhrinta qotoda dheer ee qoraallada suugaanta iyo macluumaadka ee qorayaasha kala duwan ee wax ka qoraya qeybaha kala duwan. Iyada oo loo marayo akhris dhow, doodo ku qotoma ardayga, iyo qoraalka ku saabsan suugaanta, ardaydu waxa ay sahamin doonaan kakanaanta ku xeeran aqoonsiga iyo isa-soosaarista, iyaga oo u diyaarinaya in ay horumariyaan aragtiyo qoto dheer inta ay falanqeynayaan suugaanta iyagoo ka eegaya dhaqanka, jinsiyadda, isirka, shakhsiyadda, iyo bulshada.

SPS waxa ay bixisaa koorso wehlisa Horudhaca LGBTQIA ee Suugaanta iyo Curiska

## Suugaanta Adduunka iyo Curiska 10

**Koodhadhka Koorsada:** HLA4583, HLA4584

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Suugaanta Adduunka iyo Curiska 10 waxa uu diiradda saaraa sida waayo-aragnimada aadanaha loogu muujiyo suugaanta adduunka oo dhan. Koorsadu waxa ay ardayda u bandhigtaa suugaanta ree galbeedka iyo mida aan reer galbeedka ahayn ee ka muuqda qoraallo iyo qeybo kala duwan. Iyada oo loo marayo akhris dhow, qoris, iyo doodo ku qotoma ardayga, ardaydu waxa ay ogaadaan mawduucyada iyo qaababka soo noqnoqda waxayna horumariyaan aragtiyo qoto dheer si ay u fahmaan saameynta taariikheed iyo dhaqameed ee ka dhex jira shaqooyinka suugaanta adduunka.

## Suugaanta Mareykanka iyo Curiska 11

**Koodhadhka Koorsada:** HLA3101, HLA3103

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Suugaanta Mareykanka iyo Curiska 11 waxa ay diiradda saartaa waayo-aragnimada Mareykanka iyo riyada Mareykanka. Koorsadu waxa ay ardayda u diyaarineysaa in ay la halgamaan fikrada aqoonsiga Mareykanka sida lagu muujiyey qoraallada iyo qaababka kala duwan. Fasalkani waxa uu kor u qaadaa fahamka suugaanta Mareykanka iyo qiyamka bini'aadamka ee waara ee marna mideeya marna kala sooca dadkiisa. Ardaydu waxa ay falanqeyn doonaan mowduucyada guud sida caddaaladda, aqoonsiga, kala duwanaanta dhaqanka, shakhsiyadda iyo bulshada, iyada oo loo marayo akhris dhow, doodo ardaygu garwadeen ka yahay, iyo qorista qeybo badan oo suugaan.

## Daraasaadka Dadka Madow

### Luuqada iyo Suugaanta IB – Daraasaadka Dadka Madow

**Koodhadhka Koorsada:** HLA4147, HLA4148

**Fasalada:** 11-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

**Shuruuda Kahorreysa:** ELA 9aad iyo 10aad

Koorsadani waxay baartaa todoba fikradood oo muhiim ah—wada-xiriirka, hal-abuurka, aragtida, matalaada, aqoonsiga, dhaqanka, iyo isbeddelka—Daraasaadka Dadka Madow dhexdooda, kuwaas oo diiradda saara taariikhda iyo waayaha dadka Afrikaanka ah. Mowduucyada waxaa ka mid ah Afrikaanimada, Qurbo Joogta Afrikaanka, Midaynta Afrikaanka, gumaysiga, Dumarka madow, iyo isku duubnaanta. Ardayda waxay sahmin doonaan Fiqiga Xoraynta Dadka Madow, samaysanka isirka, iyo siyaasada ixtiraamka iyagoo falanqaynaya dhaqdhaqaaqyada iska caabinta ee ka dhanka ah dulmiga. Dhammaadka koorsada, ardayda waxay horumarin doontaa faham qoto dheer oo ku saabsan aqoonsiga Dadka Madow, midnimada caalamiga ah, iyo raadinta joogtada ah ee caddaaladda isirka.

## Daraasaadka Qowmiyaadka

### Daraasaadka Qowmiyaadka Maraykanka Suugaanta iyo Curiska

**Koodhadhka Koorsada:** HLA2580, HLA2581

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Daraasaadka Qowmiyaadka Suugaanta iyo Curiska Ameerika 11A H waa simistarka koowaad ee koorso sanadka oo dhan ah taasoo kor u qaadeysa codadka dadka taariikh ahaan la faquuqo iyadoo xoogga la saarayo akhrinta qeexitaanno kala duwan iyo waayo-aragnimada waxa ay ka dhigan tahay in la noqdo Ameerikaan, iyada oo xoogga la saarayo kor u kaca casriga ah iyada oo loo marayo akhriska, qorista iyo hadalka. Koorsadu waxa ay ardayda u diyaarineysaa in ay la halgamaan fikradaha aasaasiga ah ee aqoonsiga Mareykanka, labadaba qisada Sarreynta Caddaanka iyo qisooyinka kadhanka ee muhiimka ah, sida lagu muujiyey qoraallada iyo qaababka kala duwan.

### Luuqada iyo Suugaanta IB – Daraasaadka Qowmiyaadka

**Koodhadhka Koorsada:** HLA4145, HLA4146

**Fasalada:** 11-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

**Shuruuda Kahorreysa:** ELA 9aad iyo 10aad

Koorsadani waxay baartaa todoba fikradood oo muhiim ah—wada-xiriirka, hal-abuurka, aragtida, matalaada, aqoonsiga, dhaqanka, iyo isbeddelka—Daraasaadka Qowmiyaadka dhexdooda, iyada oo diiradda la saarayo taariikhda iyo waayaha kooxaha isirka iyo qowmiyadaha la takooro. Mowduucyada muhiimka ah waxaa ka mid ah isdhexgalka isirka, dabaqada, jinsiga, iyo jinsinimada, iyo sidoo kale saamaynta gumaysiga iyo imbaradooriyada. Ardayda waxay sahmin doonaan mowduucyada gumaysi ka-baxa, qurbo joogta, iyo iska caabinta, iyagoo aragti ka helaya halgamada loogu jiro sinnaanta bulsho, dhaqaale, iyo siyaasadeed ee bulshooyinka dhaladka, laatiinka, Aasiyaanka Maraykanka, Dadka Madow, iyo bulshooyinka kale Dhammaadka, ardayda waxay fahmi doonaan aqoonsiga qowmiyadda aqoonsiga qowmiyadeed iyo caqabadaha socda ee baadi goobka caddaaladda bulshada.

## Daraasaadka LGBTQIA

### Suugaanta iyo Curiska LGBTQIA Mareykanka 11A

**Koodhadhka Koorsada:** HLA4120

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Suugaanta iyo Curiska LGBTQIA Maraykanka 11A waa koorso simistar dhan ah taasoo baarta waayaha LGBTQIA ee waaqaca Riyada Maraykanka. Iyadoo loo marayo akhris, qoraal, iyo hadal muhiim ah, ardayda waxay falanqeeyaan mowduucyada sida aqoonsiga, caddaalada, iyo bulshada oo ay ku falanqeeyaan qoraalada LGBTQIA caadiga ah iyo kuwa casriga ah. Koorsada waxay xoojisaa falanqaynta akhris-qoraalka ee ardayda, wax qorista, iyo xirfadaha afka, iyagoo isla markaana sii qoto dheereynayo fahamkooda saamaynta dhaqanka iyo taariikhda ay ku leeyihiin suugaanta. Ardayda waxay qiimeeyaan dookhyada qoraaga, soosaaraan macluumaad, waxayna dhisaan doodo casri ah. Iyadoo la sahminayo qiyamyada aadanaha caalamka iyo khibradaha kala duwan, koorsada waxay ardayda u diyaarisaa akhriska iyo qoraalka heerka kulleejka iyo shaqada ah.

***Qeexitaanada Koorsada Dugsiga Sare ee Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga:***

*SPS waxa ay bixisaa koorsooyin wehliya oo ah Afrikaanka Mareykanka, Aasiyaanka Mareykanka, Daraasaadka Qowmiyaadka, Laatiinka Mareykanka, LGBTQIA, iyo Suugaanta iyo Curiskaka Dhaladka Mareykanka*

*Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12 waxa uu ardayda u diyaariyaa kakanaanta ay ku wajihi doonaan kulleejka iyo xirfadda shaqada iyada oo loo marayo koorso si taxadar leh loo dhisay. Koorsadu waxa ay ardayda u diyaarisaa in ay si madax bannaan u fahmaan oo ay ugu lug yeeshaan falanqeynta isbarbardhigga, kor u qaadista fahamka shaqooyinka adag ee ku xeeran waaqacooda guud iyo mawduucyada waara ee ku jira suugaanta waaweyn. Sidaa daradeed, ardaydu waxa ay falanqeeyaan mowduucyada guud, sida caddaaladda, shakhsiyadda iyo bulshada, iyada oo loo marayo akhris dhow, doodo ardaygu garwadeen ka yahay, iyo qorista qeybo badan oo suugaan.*

*SPS waxa ay koorso wehel ah ka bixisaa Isbarbardhigga Suugaanta Haweenka Aan Caddaanka Ahayn.*


# Caafimaadka

## Taxanaha Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12

| Fasalka | Koorsada |
|---|---|
| FASALKA 6aad | Sayniska 6 (si loogu daro Casharrada loo baahan yahay ee Dhameystiran ee Waxbarashada Caafimaadka Galmada) |
| FASALKA 7aad | Sayniska 7 (si loogu daro Casharrada loo baahan yahay ee Dhameystiran ee Waxbarashada Caafimaadka Galmada) |
| FASALKA 8aad | Sayniska 8 (si loogu daro Casharrada loo baahan yahay ee Dhameystiran ee Waxbarashada Caafimaadka Galmada) |
| FASALKA 9aad | Waxbarashada Caafimaadka ee Caafimaadka Qoyska (0.5 kiridhit/1 simistar) |
| FASALKA 10aad | Cutubka Casharka Waxbarashada Caafimaadka Galmada oo Dhameystiran oo lagu daray hal koorso oo loo baahan yahay oo dheeraad ah |
| FASALKA 11aad | Cutubka Casharka Waxbarashada Caafimaadka Galmada oo Dhameystiran oo lagu daray hal koorso oo loo baahan yahay oo dheeraad ah |
| FASALKA 12aad | Cutubka Casharka Waxbarashada Caafimaadka Galmada oo Dhameystiran oo lagu daray hal koorso oo loo baahan yahay oo dheeraad ah |

# Xisaabta

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12



# Xisaabta

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Aljebra 1

**Koodhadhka Koorsada:** HMA2684, HMA2686

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardaydu waxa ay fududeeyaan tibaaxaha waxayna xalliyaan isla'egyada. Waxa ay aqoonsadaan sifooyinka shaqada, qaabeeyaan xaaladaha adduunka ee dhabta ah iyaga oo adeegsanaya fansaarka toosan waxay fidiyaan sifooyinka jibbaarada, waxay qaabeeyaan xiriirada jibbaarada, waxayna isu barbardhigaan fansaarka toosan iyo jibbaarada. Waxa ay adeegsadaan fansaarka isle'egta saableyda si ay u qaabeeyaan xaaladaha nolosha ee dhabta ah, waxay turjumaan matalayaasha, waxay muujiyaan sifooyinkooda muhiimka ah, waxayna soosaaraan isle'egta saableyda u dhiganta. Waxa ay xalliyaan nidaamyada isle'egta ee waaqiciga ah. Waxa ay garaaf ku sawiraan isma le'egta. Waxa ay buuxiyaan leemanka ugu habboon, bandhigyada xogta, iyo tirakoobyada kooban.

## Joomitiri

**Koodhadhka Koorsada:** HMA2692, HMA2694

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardaydu waxa ay aqoonsadaan oo ay caddeeyaan sifooyinka joomitiriga. Waxa ay dhisaan sawirada joomitiriga si ay u sahmiyaan oo ay u caddeeyaan xiriirada ka dhexeeya. Waxa ay tirooyinka ku beddelaan booska iyo kulan sallax dushiisa. Waxa ay go'aamiyaan oo ay caddeeyaan marka saddexagalada ama afar geesoolayaasha ay isu sar go'an yihiin ama isku mid yihiin. Waxa ay adeegsadaan isu ekaanshaha iyo tirignoomateriga saddexagalka xagasha quman si ay ugu xalliyaan mas'alooyinka dunida ee dhabta ah. Waxa ay xisaabiyaan itimaalka waqdhacyada keliga ah iyo kuwa isbiirsada. Waxa ay aqoonsadaan xiriirada joomitiriga ee ku jira goobooyinka. Waxa ay xalliyaan mas'alooyinka dunida dhabta ah ee bedka iyo muga.

## Aljebra 2

**Koodhadhka Koorsada:** HMA2688, HMA2690

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardaydu waxa ay bartaan fansaarada tibxaalaha si ay ugu aqoonsadaan tilmaamaha muhiimka ah una helaan eberada dhabta ah iyo kuwa adag. Waxa ay xalliyaan isle'egyada leh lakab jibbaarada ama tibaaxyaha asto xidid tiro. Waxa ay qaabeeyaan xaaladaha dhabta ah ee dunida ee leh fansaarada jibbaarada. Waxa ay duluc ka soo saaraan daraasadaha tirakoobka. Waxa ay adeegsadaan xoodka caadiga ah si ay ugu qiyaasaan boqolleyda tirada. Waxa ay sameeyaan tibaaxyaha lakabka, garaaf ku sawiraan fansaarada lakab, waxayna aqoonsadaan sifooyinkooda muhiimka ah. Waxa ay adeegsadaan halbeegga goobada si ay ugu qeexaan gacansinada garaafna ugu sawiraan fansaarada tirignoomateriga.

## Kalkulaas Kahor

**Koodhadhka Koorsada:** HMA2696, HMA2698

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardaydu waxa ay sii bartaan fansaarada oo ay ku jiraan fansaarada weydaarka, jibbaarada, iyo fansaarada algoridimka. Waxa ay bartaan in ay adeegsadaan algoridimka si ay u xalliyaan mas'alooyinka. Waxa ay falanqeeyaan tibxaalaha iyo fansaarada lakab si ay ugu go'aamiyaan sifooyinka muhiimka ah. Waxa ay bartaan saamiyo tirignomateri oo dheeraad ah, waxay soo dhiraandhiriyaan Xeerarka Saynyada/Kosaynyada, waxa ay adeegsadaan fansaarada tirignomateriga ee weydaarka ah si ay ugu xalliyaan isle'egyada, uguna sahmiyaan aqoonsiyada tirignomateriga. Waxa ay bartaan adeegsiyada taxanayaasha iyo leebabka. Waxa ay falanqeeyaan oo ay garaaf ku sawiraan jeebab toobineedyada. Waxa ay xisaabiyaan itimaalada iyo qiimayaasha la filayo.

# Barashada Jimicsiga Jirka

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12

**FASALKA 6aad — FASALKA 7aad — FASALKA 8aad**

Hal simistar oo ah barashada jimicsiga jirka fasalkiiba

**FASALKA 9aad**

| Xulashada 1 | Xulashada 2 |
|---|---|
| KU Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed (0.5 kiridhit)<br>• Koorso aasaasi ah<br>• Waxaa kormeera Khabiirka Barashada Jimicsiga Jirka oo shahaadeysan | KU Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed (0.5 kiridhit)<br>• Koorso aasaasi ah<br>• Waxaa kormeera Khabiirka Barashada Jimicsiga Jirka oo shahaadeysan |

**FASALKA 10aad — FASALKA 11aad — FASALKA 12aad**

**Xulashada 1**

Koorsada SPS PE (0.5 Kiridhit)

- Isboortiga Kooxda 1
- Isboortiga Kooxda 2
- Nashaadaadka Wakhtiga Nolosha 1
- Nashaadaadka Wakhtiga Nolosha 2
- Isboortiga Shakhsi/Labaad 1
- Isboortiga Shakhsi/Labaad 2
- Tababarka/Shuruudeynta Miisaanka 1
- Tababarka/Shuruudeynta Miisaanka 2
- Dabaasha 1
- Dabaasha 2
- Laxamada/Qoob Ka Ciyaarka 1
- Laxamada/Qoob Ka Ciyaarka 2

Koorsada SPS PE (0.5 Kiridhit)

(Xulashada koorsada - qeybta kore ka eeg)

**Xulashada 2**

Barashada Dhijitaalka (0.5 kiridhit)

- Dukumiintiyeynta 80 saacadood oo Nashaadka Jirka ah
- Waxaa kormeera shaqaale shahaadeysan

Barashada Dhijitaalka (0.5 kiridhit)

- Dukumiintiyeynta 80 saacadood oo Nashaadka Jirka ah
- Waxaa kormeera shaqaale shahaadeysan

# Barashada Jimicsiga Jirka

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyinka lagu taliyey ee ka socda baaxadda iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Jirdhiska Shakhsi Ahaaneed– Aasaaska

**Koodhadhka Koorsada:** HPE2364

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay noqon doontaa AASAASKA koowaad ee koorsada waxbarashada jirdhiska ee la qaato kahor koorsooyin kasta oo la xusho/ ikhtiyaar ah. Koorsadani dugsiga sare ah waxa ay noqon doontaa mid kamid ah saddexda (1.5) fasal ee waxbarashada jirdhiska ah ee loo baahan yahay si loo qalin jebiyo.

Dulmarka Todobaadka 1-3 Horudhaca Jirdhiska, Horudhaca qorshaha Boortofooliyada, Qeybaha qorsheynta, Toddobaadka 3-6 Barnaamijka jiheynta ee caqabadaha hawlaha jirdhiska, Qaacidada FITT, Mabaadii'da Tababarka, Toddobaadka 6-9 Falanqeynta Caqabada Jirdhiska Kahor, Dejinta Yoolka Adkeysiga Jirdhiska Muruqyada iyo Xoogga Toddobaadka 9-12 Adkeysiga hababka neefmareenka, Jiheynta La Socodka Heerka Garaaca Wadnaha iyo aaladaha kale ee tignoolajiyada ee loo soo bandhigo in jirka lagu dhiso. Toddobaadka 12-15 Qeybaha Jirka, Nafaqada, dabacsanaanta Maareynta Caafimaadka. Toddobaadka 15-18 Falanqeynta Caqabada Jirdhiska kadib, Dejinta Yoolka Boortofooliyada Qiimeynta Qorshaha Jirdhiska Shakhsi Ahaaneed.

## Barashada Jirdhiska ee Guud

**Koodhadhka Koorsada:** HPE4099

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

PE-ga Guud waa koorso loo dhan yahay oo loogu talagalay in kor loogu qaado waxqabadka jireed iyo qaab nololeedka caafimaadka qaba ee ardayda lixaad kasta leh. Koorsadu waxay xooga saari doontaa iskaashiga, ka-qaybgalka hawlo kala duwan oo jireed, iyo cilaaqaad la dhisidda asxaabta. Waxay soo bandhigi doontaa xawaare hoose, shaqo kooxeed yar, hawlo-maalmeedyo soo noqnoqda, iyo wax ka beddelada loo qasday hawlaha si loo xaqiijiyo in ardayda oo dhan uga qayb qaataan si guul ah. Koorsada waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo jawi loo dhan yahay halkaasoo ardayda oo dhan, iyadoo loo eegin lixaadkooda, loo awoodsiiyo inay si buuxdo oo loo siman yahay ugu lug yeeshaan barashada jimicsiga jirka.

## Barashada Jimicsiga Jirka Kooxda Isboortiga 1

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5522

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay taageertaa barnaamij la yiraahdo “Five for Life” kaas oo ah manhaj cilmi-baaris lagu hago, oo heerar ku saleysan oo loogu talagalay in uu baro mabaadii'da caafimaadka iyo jirdhiska. Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta ISBOORTIGA KOOXDA 1 ayaa sii wadaya dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si loo falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey in uu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed kusaleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Kooxda Isboortiga 2

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5523

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadu waxa ay ballaarin doontaa aqoonta cilmiga lagu baranayo oo lagu bixinayo laguna qiimeynayo KOOXAHA ISBOORTIGA 1 Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil Koorsadani waxa ay taageertaa barnaamij la yiraahdo “Five for Life” kaas oo ah manhaj cilmi-baaris lagu hago, oo heerar ku saleysan oo loogu talagalay in uu baro mabaadii'da caafimaadka iyo Jirdhiska. ISBOORTIGA KOOXDA 2 ayaa sii wadaya dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si loo falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijka waxaa loogu talagalay in uu daboolo baahiyaha ardayda fasalka dhigata.

## Barashada Jimicsiga Jirka Dabaasha 1

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5524

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay diiradda saari doontaa Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil 4. Dejinta Yoolka 5. Diiwaanka Waxqabadka habdhaqanka Jirdhiska La Xiriira Waxa uu ka shaqeysiiyaa DABAASHA 1 waxa uu sii wadaa dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si uu u falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani

waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed kusaleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan jirdhiskooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Dabaasha 2

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5525

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay ka ballaaran doontaa Dabaasha 1 Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil 4. Dejinta Yoolka 5. Diiwaanka Waxqabadka habdhaqanka Jirdhiska La Xiriira Waxa uu ka shaqeysiiyaa DABAASHA 2 waxa uu sii wadaa dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si uu u falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey in uu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed kusaleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan jirdhiskooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Tababarka/ Shuruudeynta Miisaanka 1

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5526

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil 4. Dejinta Yoolka 5. Diiwaanka Waxqabadka habdhaqanka Jirdhiska La Xiriira Waxa uu ka shaqeysiiyaa TABABARKA/ SHURUUDEYNTA MIISAANKA 1 waxa uu sii wadaa dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si uu u falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayda waxaana ku jira qeyb Webseed ku saleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan jirdhiskooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Tababarka/ Shuruudeynta Miisaanka 2

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5527

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil 4. Dejinta Yoolka 5. Diiwaanka Waxqabadka habdhaqanka Jirdhiska La Xiriira Waxa uu ka shaqeysiiyaa TABABARKA/ SHURUUDEYNTA MIISAANKA 2 waxa uu sii wadaa dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si uu u falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ee ardayda waxaana ku jira qeyb Webseed ku saleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan jirdhiskooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Waxqabad Shakhsi/ Laba Ah 1

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5528

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil 4. Dejinta Yoolka 5. Diiwaanka Waxqabadka habdhaqanka Jirdhiska La Xiriira waxa uu ka shaqeysiiyaa WAXQABADYADA SHAKHSIGA IYO KUWA LABADA 1 waxa uu sii wadaa dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si uu u falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed ku saleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Waxqabad Shakhsi/ Laba Ah 2

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5529

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta 3. Boortofooliyada Noqo Mid Fayo-qaba/ Noqo Caaqil 4. Dejinta Yoolka 5. Diiwaanka Waxqabadka habdhaqanka Jirdhiska La Xiriira Waxa uu ka shaqeysiiyaa WAXQABADYADA SHAKHSIGA IYO KUWA LABADA 2 waxa uu sii wadaa dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska isagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si uu u falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed kusaleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Waxqabadka Waqtiga Nolosha/Yoga 1

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5530

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay taageertaa barnaamij la yiraahdo Five for Life kaas oo ah manhaj cilmi-baaris lagu hago, oo heerar ku saleysan oo loogu talagalay in uu baro mabaadii'da caafimaadka iyo jirdhiska. Inta lagu jiro koorsadan ardaydu waxa ay baran doonaan waxyaabaha soo socda: Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta NASHAADAADKA WAKHTIGA NOLOSHA 1 ayaa sii wadaya dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska iyagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si loo falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed ku saleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Waxqabadka Waqtiga Nolosha/Yoga 2

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5531

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay ballaarin doontaa macluumaadka laga bartay Waxqabadyada Waqtiga Nolosha 1 waxa ayna sii wadeysaa in ay taageerto barnaamij la yiraahdo "Five for Life" kaas oo ah manhaj cilmi-baaris lagu hago, oo heerar ku saleysan oo loogu talagalay in uu baro mabaadii'da caafimaadka iyo jirdhiska. Inta lagu jiro koorsadan ardaydu waxa ay wax kasii baran doonaan waxyaabaha soo socda: Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska -Shanta Qeybood ee Hawlaha Jirdhiska Ayaa Furaya WAXQABADYADA WAQTIGA NOLOSHA 2 ayaa sii wadaya dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska iyagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si loo falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed ku saleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Laxanka/Qoob Ka Ciyaarka 1

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5532

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay taageertaa barnaamij la yiraahdo Five for Life kaas oo ah manhaj cilmi-baaris lagu hago, oo heerar ku saleysan oo loogu talagalay in uu baro mabaadii'da caafimaadka iyo jirdhiska. Inta lagu jiro koorsadan ardaydu waxa ay wax kasii baran doonaan waxyaabaha soo socda: Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska 1. Shanta Qeybood ee Waxqabadyada Jirdhiska 2. Heerarka xooganaanta Laxamada iyo Qoob Ka Ciyaarka 1 ayaa sii wadaya dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska iyagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si loo falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed kusaleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda.

## Barashada Jimicsiga Jirka Laxanka/Qoob Ka Ciyaarka 2

**Koodhadhka Koorsada:** HPE5533

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsadani waxa ay ballaarin doontaa macluumaadka laga bartay Laxamada iyo Qoob Ka Ciyaarka 1 waxa ayna sii wadeysaa in ay taageerto barnaamij la yiraahdo Five for Life kaas oo ah manhaj cilmi-baaris lagu hago, oo heerar ku saleysan oo loogu talagalay in uu baro mabaadii'da caafimaadka iyo jirdhiska. Inta lagu jiro koorsadan ardaydu waxa ay wax kasii baran doonaan waxyaabaha soo socda: Macluumaadka Tacliinta Caafimaadka iyo Jirdhiska Laxamada iyo Qoob Ka Ciyaarka 2 ayaa sii wadaya dejinta yoolka iyo cabbiraadaha jirdhiska iyagoo taageeraya qeybta diiwaan-keydinta si loo falanqeeyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Barnaamijkani waxaa loo habeeyey inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga waxaana ku jira qeyb Webseed kusaleysan oo ardayda siineysa fursad ay ku raadraacaan oo ay ku qiimeeyaan natiijooyinkooda guud ahaan natiijooyinkooda oo dhan.

# Sayniska

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12

| Fasalka | Koorsada |
| --- | --- |
| FASALKA 6aad | Sayniska 6 |
| FASALKA 7aad | Sayniska 7 |
| FASALKA 8aad | Sayniska 8 |
| FASALKA 9aad | Fiisikiska A iyo Kimistiriga A |
| FASALKA 10aad | Baayolajiga A iyo Baayolajiga B |
| FASALKA 11aad | Kimistiriga B iyo Fiisikiska B |
| FASALKA 12aad | Koorsadi kasta oo Saynis ah oo la oggolaaday (waa ikhtiyaari) |

### Fiirooyin Gaar ah:

**Kimistiriga B iyo Fiisikiska B ayaa si weyn loogu talinayaa dhowr sababood oo muhiim ah dartood:**

- Aasaas Saynis Adag: Koorsooyinkani waxay bixiyaan cilmiga aasaasiga ah ee kimistiriga iyo fiisikiska labadaba, iyagoo ardayda u diyaariya dariiqyo kala duwan oo ballaaran oo kulleejka iyo shaqada ah.
- Waxay Buuxisaa Shuruudaha Gelitaanka Kulleejka: Shuruudaha Qeybinta Tacliimeed ee Gobolka Washington (CADR-yaada) waxay ubaahan yihiin hal kiridhit saynis oo ah bayoolojі, kimistiri, ama fiisikis. Qaar badan oo ka mid ah kulleejyada 4-ta sano ah waxay sidoo kale ubaahan yihiin sanad buuxa oo kimistiri ah (iyo mararka qaar fiisikis) si la isaga qoro. Kimistiriga A+ iyo Kimistiriga B waxa uu qanciyaa sanadka buuxa ee kimistiriga, halka Fiisikiska A + Fiisikiska B uu buuxiyo sanad buuxa oo fiisikis ah.

**Kiridhitka saddexaad ayaa laga yaabaa in lagu doorto daneynta ardayga waxaana ku jiri kara koorso CTE oo saynis u dhiganto.**

Fadlan Dugsigaaga Sare ka eeg AP, IB, Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa ah, Sayniska CTE u dhigma, iyo xulashooyinka kale ee kiridhitka saddexaad ee sayniska.

# Sayniska

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Fiisikiska A

**Koodhadhka Koorsada:** HSC2728

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Fiisikiska A waa manhaj ardayga ku qotoma oo diiradda saara sababeynta sayniseed. Cutub kasta, ardaydu waxa ay wadaagaan aqoonti hore, waxa ay soo ururiyaan oo ay falanqeeyaan caddeynta, waxa ayna yeeshaan qaababka sayniska aasaasiga ah. Qaababkani waxa ay soo koobaan korontada danabeysan ee fadhida, korontada qulqulleysa, bir labka, iyo hirarka. Ardaydu waxa ay awoodi doonaan in ay sharraxaan falgallada u dhexeeya walxaha danabeysan iyo kuwa dhexdhexaadka ah, falgallada bir labta, xiriirka ka dhexeeya qulqulka korantada iyo goobaha bir labtu dangiigto, astaamaha hirarka, falgallada hirarka, iyo hirarka korontada bir labta.

## Kimistiriga A

**Koodhadhka Koorsada:** HSC2720

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Maadada Kimistiriga A, ardaydu waxa ay iska kaashadaan inay horumariyaan fahamka fikradaha kimistiriga ee aasaasiga ah. Waxa ay horumariyaan qaababka si ay u muujiyaan sida isbeddelada atamka ay midabo kala duwan uga abuuri karaan xidigaha. Ardaydu waxa ay falanqeyn doonaan xogta si ay u sharraxaan sida isku dhisyada ay u gudbin karaan korontada ama ugu karkari karaan heerkulo kala duwan.

Ardaydu waxa ay sidoo kale qaabeyn doonaan noocyada kala duwan ee falgallada bu'eed waxa ayna falanqeyn doonaan saameyntooda kala duwan.

## Baayoloji A

**Koodhadhka Koorsada:** HSC2712

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Maadada Baayolojiga A, ardaydu waxa ay daraaseeyaan ifafaalaha dunida dhabta ah, iyada oo diiradda la saarayo maatarka iyo kala roga tamarta oo ay ku daraaseynayaan cabbiro kala duwan (unugleyda, noolayaasha, nidaamyada deegaan, iyo nidaamyada dhuleed). Waxa ay ugu lug yeeshaan si firfircoon iyaga oo wadaagaya aqoon hore, su'aal iska weydiinaya, daraaseynaya, qiimeynaya xogta, oo tarjumaya caddeynta. Iyada oo loo marayo doodo, is-afgarad dhis, abuuris qaabeed, muraajaco ku saleysan caddeynta, iyo wada-hadallo fasal, waxay u dhisaan sharraxaad dhammaystiran oo ku saabsan dhacdo kasta.

## Baayoloji B

**Koodhadhka Koorsada:** HSC2716

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Maadada Baayolojiga B, ardaydu waxa ay daraaseeyaan hababka wareejinta macluumaadka ee miisaanka noolaha ee waaqica dhabta ah iyo caqabadaha. Waxa ay u daadagaan dhinacyada unugleyda iyo moolkiyuulka atamka (sida is-qeybinta unuga iyo xakameynta hide sidaha), shaqada noolaha (oo ay ku jiraan korriinka, sifooyinka, iyo jawaab-celinada), iyo ifafaale baaxad weyn (sida kala duwanaanshaha noolayowga iyo arrimaha nidaamka deegaan). Koorsada oo dhan, ardaydu waxa ay si firfircoon u xoojiyaan sayniskooda iyo xirfadahooda injineerinka.

## Kimistiriga B

**Koodhadhka Koorsada:** HSC2724

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Maadada Kimistiriga B, ardaydu waxa ay iska kaashadaan in ay dhisaan fahamkooda falgallada kiimikaad marka loo eego xaaladaha iyo mas'alooyinka dunida dhabta ah. Ardaydu waxa ay falanqeyn doonaan xogta si ay u abuuraan sharaxaad ku saabsan waxa saameyn doona xawaaraha falgalka kiimikaad iyo inay saadaaliyaan waxa keeni doona falgalku in uu u dhaqaaqo xagga falgalaha ama maxsuulka. Ardaydu waxa ay adeegsan doonaan fikirka xisaabeed si ay isugu kala beddelaan cabbirada si loo taageero fikradda ilaalinta cufka loona sameeyo saadaal ku saabsan isbeddelada tamarta.

## Fiisikiska B

**Koodhadhka Koorsada:** HSC2732

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Maadada Fiisikiska B waa manhaj fiisikis oo ku qotoma ardayga oo xoogga saara sababeynta sayniseed, gaar ahaan ku aadan Tamarta, Awoodda, iyo Cuf Isjiidadka Dhulka iyo saameynta ay ku leeyihiin dhaqdhaqaaqa walxaha. Cutub kasta, ardaydu waxa ay isla wadaagaan aqoon hore, waxa ay soo ururiyaan oo ay falanqeeyaan caddeynta, waxa ayna dhisaan qaabab fikireed.

Ardaydu waxa ay adeegsadaan garaafyada xawaaraha iyo waqtiga si ay ugu caddeeyaan kala gudbinta tamarta, waxa ay fahmaan oo ay dabaqaan Xeerka Niyuutan, waxa ay xisaabiyaan kararta iyo xooggaga, waxa ayna sharraxaadaha xoogga iyo tamarta ay ku dabaqaan cuf isjiidadka dhulka, oo ay ku jiraan dhabbayaasha meereeyaasha iyo gantaalaha hawada sare.

# Cilmiga Bulshada

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12

**FASALKA 6aad**
Taariikhda Adduunka 6

**FASALKA 7aad**
Taariikhda Gobolka WA 7

**FASALKA 8aad**
Taariikhda Mareykanka ee Daraasaadka Dadka Madow 8, Taariikhda Mareykanka ee Filibiinka Mareykanka 8

**FASALKA 9aad**
Taariikhda Adduunka 1 iyo Taariikhda Adduunka 2 Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 2, Taariikhda Adduunka AP 1, -ama- Juqraafiga Aadanaha AP A

**FASALKA 10aad**
Taariikhda Adduunka 3 Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 3 Taariikhda Adduunka AP 2 Juqraafiga Aadanaha AP B, Adduunka Daraasaadka Dadka Madow 3 -ama- LGBTQIA Taariikhda Adduunka 3

**FASALKA 11aad**
Taariikhda Mareykanka, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Mareykanka IB, Taariikhda Mareykanka AP, CIHS AES 151, CIHS 147 & 148, Daraasaadka Afrikaanka Maraykanka AP, Daraasaadka Dadka Madow -ama- Taariikhda Mareykanka Filipinx iyo Latinx

**FASALKA 12aad**
Dhaqaalaha Rayidka Dawlada Maraykanka, IB Qarniga 20aad -ama- Dowladda Mareykanka & Siyaasadda AP

# Cilmiga Bulshada

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Taariikhda Adduunka 1 iyo 2

**Koodhadhka Koorsada:** HSS5852, HSS5853

**Fasalada:** 9-10

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Taariikhda Adduunka 1 iyo 2 waxa ay diiradda saareysaa ilbaxnimada guud ahaan caalamka, iyada oo diiradda saareysa 600 C.E. ilaa 1440 C.E. Ardaydu waxa ay ku hawlanaan doonaan qaar kamid ah su'aalaha ugu qotoda dheer ee soo wajaha taariikhyahanada laga soo bilaabo sharraxaadda kor u kaca iyo dhicitaanka bulshooyinka ilaa doorka juqraafiga iyo ballaarinta dhaqameedku ay ka ciyaareen qaabeynta bulshada iyo shakhsiyaadka. Manhajka Since Time Immemorial (Tan iyo Waqtigii Hore) ayaa lagu dhex dari doonaa koorsadan oo dhan.

SPS waxa ay bixisaa koorsada wehelka ee Taariikhda Adduunka Daraasaadka Qowmiyaadka II.

## Taariikhda Adduunka 3

**Koodhadhka Koorsada:** HSS5854

**Fasalada:** 9-10

**Buundada:** .50

**Muddada:** Hal simistar

Taariikhda Adduunka 3 waxa ay daraaseysaa soo ifbaxa dhaqamada caalamka iyo qaramada ee aan maanta aqoonsanahay. Su'aalaha sida gaarka ah u hagaya ee lagu qaabeynayo daraasadda muddadan waxaa kamid ah: Waa maxay xiriirka ka dhexeeya khilaafyadii waaweynaa ee caalamiga ahaa ee qarnigii 20aad iyo ilaa xad intee le'eg ayay natiijooyinkoodu ahaayeen kuwo togan ama taban? Sideese hantida sida siman aan uqeybsaneyn ee adduunka oo dhan u qaabeyneysaa dhaqaalaha caalamka, bulshada, iyo dhaqanka? Manhajka Since Time Immemorial (Tan iyo Waqtigii Hore) ayaa lagu dhex dari doonaa koorsadan oo dhan.

SPS waxa ay bixisaa koorsooyinka wehelka ee Taariikhda Adduunka III Daraasaadka Qowmiyaadka iyo LGBTQIA.

## Taariikhda Mareykanka 11

**Koodhadhka Koorsada:** HSS5856, HSS5857

**Fasalada:** 11

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Taariikhda Mareykanka 11 waxa ay ku bilaabmeysaa asalkii Jamhuuriyadda Mareykanka iyo wixii ka dambeeyay Dagaalkii Sokeeye. Koorsadu waxa ay xoogga saareysaa soo ifbaxa waayaha casriga ah laga soo bilaabo bilowgii Kacaankii Warshadaha ilaa hadda. Ardaydu waxa ay la halgami doonaan su'aalaha khuseeya taariikhda Mareykanka laga soo bilaabo doorka saxda ah ee dawladeed ee dimoqraadiyadda wakiillada iyo doorka dhaqdhaqaaqa bulshada ee ku aadan qaabeynta sifada waaya-aragnimada Mareykanka. Manhajka Since Time Immemorial (Tan iyo Waqtigii Hore) ayaa lagu dhex dari doonaa koorsadan oo dhan.

SPS waxa ay bixisaa koorsooyinka wehelka ee Daraasaadka Dadka Madow, Daraasaadka Qowmiyaadka, Filipinx iyo Taariikhda Laatiinka Mareykanka

## Dowladda Mareykanka, Cilmiga Rayidka iyo Dhaqaalaha 12

**Koodhadhka Koorsada:** HSS1742

**Fasalada:** 12

**Buundada:** .50

**Muddada:** Hal simistar

Dowladda Mareykanka, Cilmiga Rayidka iyo Dhaqaalaha 12 ayaa ardayda siiya fahamka taariikhiga ah iyo kan hadda ee ku saabsan sida dawladoodu u shaqeyso, sababta kaqeybgalka madaniga ahi ay muhiim ugu tahay dimuqraadiyadda, iyo sida nidaamkooda dhaqaale uu u shaqeeyo. Marka ay dhammaato koorsada, ardaydu waxa ay fahmi doonaan xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha muwaadiniinta sida ku xusan Dastuurka Mareykanka ardayda waxa ay sidoo kale tixgelin doonaan ilaa inta dadka Mareykanka ay ku nool yihiin bulsho xor ah. Xiisadda u dhaxeysa cali beesteenka iyo dawladda federaalka ayaa sidoo kale la sahmin doonaa iyada oo lagu sahminayo manhajka Tan iyo Waqtigii Hore.

## Daraasaadka Dadka Madow

**Iskaashiyada bulshada ayaa tixgelin la siiyaa waxaana lagu daraa horumarinta koorsooyinka hadda iyo kuwa mustaqbalka.*

### Taariikhda Adduunka Daraasaadka Dadka Madow 3 iyo 4

**Koodhadhka Koorsada:** HSS4503, HSS4504

**Fasalada:** 9-10

**Buundada:** 0.5 simistarkiiba

**Muddada:** Hal sano

Koorsadani waxa ay bixineysaa sahmin dhammeystiran oo kusaabsan saameynta caalamiga ah ee taariikhda iyo dhaqanka dadka Madow, laga bilaabo ilbaxnimadihii hore ilaa wakhtigan casriga ah. Ardaydu waxa ay daraaseyn doonaan waxyaabihii shaqsiyaadka iyo bulshada Madow ay kusoo kordhiyeen horumarka bulshooyinka adduunka oo dhan, iyo sidoo kale caqabadihii ay soo mareen taariikhda oo dhan. Iyada oo la daraaseynayo dhacdooyinkii ugu muhiimsanaa, dhaqdhaqaaqyadii, iyo dadki saameynta lahaa, ardaydu waxay heli doonaan faham qoto dheer oo ku saabsan adkeysiga, hal-abuurka, iyo saameynta dhaqamada dadka Madow ee gobollada kala duwan. Koorsadu waxa ay sidoo kale xoogga saari doontaa isku xirnaanta taariikhda dadka Madow ay ku xiran yihiin dhacdooyinka caalamka, ganacsiga, iyo isdhaafsiga dhaqanka, taasoo kobcineysa aragti caalami ah oo ku saabsan khibradaha iyo guulaha dadka Madow.

### Taariikhda Mareykanka Daraasaadka Dadka Madow 11A iyo 11B

**Koodhadhka Koorsada:** HSS4123, HSS4124

**Fasalada:** 11

**Buundada:** 0.5 simistarkiiba

**Muddada:** Hal sano

Koorsadani waxa ay sahmineysaa taariikhda dadka Madow/Afrikaanka Mareykanka ay ku leeyihiin dalka Mareykanka, iyadoo diiradda saareysa waxa ay soo kordhiyeen, halgamadoodii iyo guulahoodii. Ardaydu waxa ay baari doonaan dhacdooyinkii ugu muhiimsanaa, dadki saameynta lahaa, iyo dhaqdhaqaaqyadii qaabeeyey waaya-aragnimada dadka Madow/Afrikaanka Mareykanka laga soo bilaabo addoonsiga ka hor ilaa maanta. Intaa waxaa dheer, ardaydu waxa ay falanqeyn doonaan saameynta dhaqanka dadka Madow uu ku leeyahay bulshada, siyaasadda, iyo farshaxanka Mareykanka. Mowduucyada lagu qaadanayo waxaa kamid ah waagii Dib-u-dhiska, waagii Jim Crow, Dib-u-soo nooleyntii Harlem, Haajiritaankii Weynaa, Brown v. Board ee Waxbarashada, Waagii Xuquuqda Madaniga, iyo walaacyada casriga ah. Iyadoo la adeegsanayo falanqeyn aasaasi ah, wada-hadalo qoto dheer, iyo cilmi baaris, ardaydu waxa ay heli doonaan faham qoto dheer oo ku saabsan sheeko xariirada dadka Madow/Afrikaanka Mareykanka gudaha waaqica guud ee taariikhda Maraykanka.

## Daraasaadka Qowmiyaadka

**Iskaashiyada bulshada ayaa tixgelin la siiyaa waxaana lagu daraa horumarinta koorsooyinka hadda iyo kuwa mustaqbalka.*

### Taariikhda Laatiinka Mareykanka

**Koodhadhka Koorsada:** HSS4143, HSS4144

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay daraaseyneysaa sida dadyowga ku abtirsada Laatiinka Mareykanka ay ula qabsadeen, u dhexgaleen, ku milmeen, uga hortageen, oo u qaateen xoogag badan oo siyaasadeed, dhaqan, iyo dhaqaale oo saameeyay noloshooda Mareykanka iyo sida ay u abuureen aqoonsiyo cusub oo qoomiyadeed, isir oo ay aqoonsi gaar ah u yeesheen intii ay hawsha ku jireen. Ardaydu waxa ay baran doonaan taariikhda dheer ee dadka Laatiinka Mareykanka gudaha iyo dibedda Mareykanka iyo sida, iyada oo aan la haysan lahayn qisooyinkaan, Mareykanka sida aanu wada ogsoonahay, uusan u jiri lahayn sida uu hadda yahay.

### Taariikhda Dadka Filibiinka Mareykanka

**Koodhadhka Koorsada:** HSS4501, HSS4502

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxa ay daraaseyn doontaa Taariikhda Mareykanka iyada oo laga eegayo waaya-aragnimada Dadka Filibiinka Mareykanka. Xiriirada qeybaha isu imaatinada ayaa si qoto dheer dib loogu eegi doonaa dhinacyada dhacdooyinka jinsiyadaha dhexdooda, u istaagidda ardayda, iyo wax ku biirinta taariikhiga ah iyo kuwa hadda ee Dadka Filibiinka Mareykanka ay ku biiriyeen Mareykanka. Ardaydu waxa ay yeelan doonaan aqoon juqraafiyeed, faham dhaqaale, xikmad rayid iyo ka go'naan, iyo aqoonta taariikhiga ah/aragtida laga soo bilaabo 1877- Hadda iyada oo laga eegayo aragtida Dadka Filibiinka Mareykanka. Koorsadu waxa ay dabooli doontaa mowduucyo sida Dagaalkii Filibiin iyo Mareykanka, Xeerka Pensionado, Ururka Shaqaalaha Filibiin, iyo Xeerka Tydings-McDuffie.

### Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka

**Koodhadhka Koorsada:** HSS5082, HSS2584, HSS2585 (qoondeynta Maamuuska)

**Fasalada:** 11

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Laba simistar

Koorsadani waxaa loogu talagalay in lagu daraaseeyo nafta iyo bulshada iyada oo loo marayo doorbinada Daraasaadka Qowmiyaadka. Waxaan isku hawli doonaa barasho mas'alo abuurid ah iyo weydiimo qoto dheer si aan u yeelano lahaanshaha qisooyinkeena oo aan u fahanno ugana jawaabno cadaalad darada siyaabo kala duwan. Koorsadu waxa ay sahmineysaa afar qeybood oo waaweyn oo waxbarasho: Aqoonsiga, Awooda iyo Dulmiga,

Xoraynta iyo iska Caabinta, iyo Ficilka iyo Milicsiga. Waxaan ku lammaanin doonaa farshaxanka waxaana udub dhexaad uga dhigi doonaa taariikhaha faquuqa, codadka, suugaanta, iyo dhacdooyinka hadda jira oo ay ku jiraan caddaalad-darrada cimilada si loo sahamiyo xalalka adduunka isbed-beddelaya.

## Taariikhda Adduunka Daraasaadka Qowmiyaadka 2

**Koodhadhka Koorsada:** HSS2576

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Taariikhda Adduunka Daraasaadka Qowmiyaadka 2 waa midda labaad ee koorsooyin saddex simistar ah oo isku xiga kuwaas oo daraaseeya soo ifbaxa ilbaxnimada ee guud ahaan caalamka iyo sida ay u koreen ugana yimaadeen is-dhexgalka midba midka kale ee boqortooyooyinka, imbiraadooriyooyinka, iyo ugu dambeyntii qaramada aan aqoonsannahay maanta. Koorsada waxa loo qaabeeyey qaab-dhismeedyada Daraasaadka Qowmiyaadka ee: Aqoonsiga, Awooda iyo Dulmiga, Xoraynta iyo iska Caabinta, iyo Ficilka iyo Milicsiga.

## Taariikhda Adduunka Daraasaadka Qowmiyaadka 3

**Koodhadhka Koorsada:** HSS2576

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Taariikhda Adduunka Daraasaadka Qowmiyaadka 3 waa koorsooyin Taariikhda Adduunka oo saddex simistar ah oo isku xiga ah oo daraaseynaya taariikhda dhaqamada caalamka iyo ummadaha aanu maanta aqoonsannahay. Gaar ahaan, ardaydu waxa ay daraaseyn doonaan khilaafaadka caalamiga ah ee casriga ah iyo siyaasadda iyo cawaaqibkooda ee qarniga kow iyo labaatanaad iyo dhaqaalaha, bulshada, iyo dhaqanka adduunka ee qarniga kow iyo labaatanaad. Koorsada waxa loo qaabeeyey qaab-dhismeedyada Daraasaadka Qowmiyaadka ee: Aqoonsiga, Awooda iyo Dulmiga, Xoraynta iyo iska Caabinta, iyo Ficilka iyo Milicsiga.

## Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa Daraasaadka Qowmiyaadka (AME 151 DARAASAADKA QOWMIYAADKA MAREYKANKA)

**Koodhadhka Koorsada:** HSS7739, HSS7741

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Waxa ay ardayda u soo bandhigtaaa xoogagga bulsheed ee taariikhiga ah iyo kuwa casriga ah iyo dhaqdhaqaaqa awoodda ee dhisa aqoonsiga jinsiyadeed iyo qowmiyadeed gudaha Mareykanka. Ardaydu waxa ay baran doonaan sida gumeysiga, hantiwadaaga, & Imbiraadooriyada ay u saameeyaan isirka/sinjiga bulshooyinka. Ardaydu waxa ay sidoo kale eegaan sida isirka & qoomiyaduhu ula falgalaan aqoonsiyada kale sida dabaqada, jinsiga, galmonimada, dhalashada, & kartida. Waxay sawirtaa arrimaha dhulka iyo xuquuqda shaqada, haajiritaanka, waxbarashada, iyo dhaqanka caanka ah. Ardayda ka diiwaangashan koorsadan waxa ay heli karaan kiridhitka kulleejka isla koorsada iyaga oo ku helaya North Seattle College.

## Daraasaadka LGBTQIA

**Iskaashiyada bulshada ayaa tixgelin la siiyaa waxaana lagu daraa horumarinta koorsooyinka hadda iyo kuwa mustaqbalka.*

## LGBTQIA Taariikhda Adduunka 3

**Koodhadhka Koorsada:** HSS4122

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistaro

Taariikhda iyo Dhaqanka LGBTQIA+ waa koorso simistar dhan ah oo sahmisa isku xirnaanta waayaha shakhsiyaadka LGBTQIA+ iyadoo loo marayo taariikhda iyo waaqaca casriga ah. Ardayda waxay baaraan mowduucyada sida aqoonsiga, matalaadda, nidaamyada awoodda, gumeysiga, hanti-wadaaga, iyo dhaqdhaqaaqyada iska caabinta. Koorsadu waxay diirada saartaa halgamada iyo adkeysiga bulshada la faquuqo ee LGBTQIA+, iyadoo la kobcinayo falanqaynta muhiimka ah ee doorkooda qaabaynta isbeddelka bulsho, siyaasadeed, iyo dhaqameed. Dhammaadka koorsada, ardayda waxay faham qoto dheer ka haysan doonaan taariikhda LGBTQIA+ iyo ku xirnaantooda dhaqdhaqaaqyada ballaaran ee sinnaanta iyo caddaalada, iyadoo u diyaarinaysa daraasado horumarsan oo taariikhda iyo caddaaladda bulshada ah.

# Bandhiga Fanka & Farshaxanka

## Taxanaha Koorsada & Tusaalooyinka Fasalada 6-12

FASALKA 6aad

FASALKA 7aad

FASALKA 8aad

Hal simistar oo ah farshaxanka muuqda, bandhiga fanka, ama fanka warbaahinta sanad kasta fasalada 6-8.

FASALKA 9aad

FASALKA 10aad

FASALKA 11aad

FASALKA 12aad

2 kiridhit oo ah Bandhiga Fanka & Farshaxanka, oo mid kamid ah uu aadi karo xaga ardayga ee *Diyaargarowga Shakhsi Ahaaneed* [c].

Ugu yaraan, ardaygu waxa uu ubaahan yahay 1 kiridhit oo fanka ah.

[c] *Si aad u hesho qeexitaanka Diyaargarowga Shakhsi Ahaaneed, fadlan ka eeg shuruudaha qalin jabinta ee kujira webseedka Guddiga Waxbarashada Gobolka:* https://www.sbe.wa.gov/our-work/graduation-requirements

### Tusaalooyinka:

***Arday raba inuu raaco dhaqanka fan gaar ah (tusaale muusig):***

- Fasalka 6aad: Hobolada Hordhaca
- Fasalka 7aad: Hobolada Dhexe
- Fasalka 8aad: Hobolada Bandhiga
- Fasalka 9aad: Hobolada Xargaha Kabanka
- Fasalka 10aad: Hobolada Bandhiga
- Fasalka 11aad: Hobolada Qalabka Muusiga
- Fasalka 12aad: Hobolada Kooxda ah

***Ardayga raba inuu sahmiyo dhaqamada fanka oo badan:***

- Fasalka 6aad: Bilowga Farshaxanka Muuqda
- Fasalka 7aad: Khibrada Muusiga
- Fasalka 8aad: Bilowga Tiyaatarka
- Fasalka 9aad: Bilowga Sawirida & Riinjiyeynta
- Fasalka 10aad: Bilowga Tiyaatarka/Sare
- Fasalka 11aad: Laabka Gitaarka 1
- Fasalka 12aad: Bilawga Sawir Qaadista

# Bandhiga Fanka & Farshaxanka

*Fadlan la soco, boggagani kaliya waxa ay ku daraan saambalka koorsooyinka laga bixiyo Bandhiga Fanka & Farshaxanka ee loogu talagalay qoob ka ciyaarka, fanka warbaahinta, muusiga, masraxa, iyo fanka muuqda. Fadlan la xiriir iskuulkaaga si aad u ogaato koorsooyinka ay bixiyaan. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Qoob Ka Ciyaarka

### Qoob Ka Ciyaarka Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7938, HFA7939

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Koorsooyinkani waxay ardayda ku hawlgeliyaan mabaadii'da aasaasiga ah ee dhaqdhaqaaqa: booska, waqtiga, qaabka, iyo dadaalka iyadoo loo marayo Qoob ka Ciyaarka, La Jaanqaadka, Jaasta, Masraxa Muusiga, iyo Qaababka qoob ka ciyaarka. Ardaydu waxa ay bartaan erey-bixinta qoob ka ciyaarka, farsamada, tallaabo isla qaadista inta ay horumarinayaan qaddarinta qoob ka ciyaarka sidii farshaxan ahaan.

## Fanka Warbaahinta

### Sawir Qaadista Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA8151, HFA8152, HCT2536, HCT2537

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 ilaa 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Hal sano ama labo simistar

Bilawga Sawir Qaadista waxaa loogu talagalay sahaminta sawir-qaadista sidii hab isgaarsiin muuqaal ah oo hal-abuur leh. Ardayda dhigata koorsadan waxa ay bartaan hawlgallada kaamirada ee aasaasiga ah iyo mabaadii'da sawir-qaadista sida sawir isku aadinta, iftiin ku furista, qaabka istaagista, iyo wax ka beddelidda. Sawir Qaadista Horumarsan waxay sii kordhinaysaa waxbarashadaas iyadoo ardayda fikradahooda ku horumarinayo leyliyo furan isla markaana sawir qaadista u sahminaya sidii dariiq shaqo oo laga mira dhalin karo.

### Fiidiyowga Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2452, HCT2453, HCT2454, HCT2455

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 ilaa 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Hal sano ama labo simistar

Bilawga Sawir Qaadista waxa ay bartaa aasaaska sida si hal-abuur leh oo wax ku ool ah wax loogu gudbiyo sheekooyinka muuqaalka ah iyada oo lagu eegayo shaashada kamarada fiidiyowga, oo ay ku jirto falanqeynta warbaahinta muhiimka ah. Ardayda ayaa iskaashada inta ay baranayaan habka fiidiyow soosaarista: soosaarista kahor (qorsheynta, fikrado la imaanshaha, iyo aqoonsiga kheyraadka), soosaarista (iftiin ku furista, isku aadinta, iyo farsamooyinka cod duubista), iyo soosaarista kadib (ku tafatirka sawirada, codka, iyo wax ka beddelka muuqashada). Noocyada soo saarada waxaa ku jiri kara sheeko, dukumentari, warar, macluumaad, iyo tijaabo. Fiidiyowga Horumarsan waxay waxbarashadaasi ku sii kordhinaysaa shaqo ku salaysan hawlo kooxeed si loo soo saaro soo saaro waawayn oo kala duwan.

## Muusiga

### Kooxda Qalabka Muusiga

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7978, HFA7979

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Isu imaatinkan bandhigga ee sanadka oo dhan ah waxaa loogu talagalay ardayda garaaca qalabka xargaha kabanka, qalabka la afuufo, turumbada, iyo qalabka la garaaco. Ardayda waxay horumarisaa cod soo saarista, qaabaynta, laxamaynta, iyo cod sixidda, iyo xirfado farsamo oo horumarsan oo la xiriira qalabka qofka oo ay weheliso qaab-istaagga saxda ah. Ardayda qalabka muusiga waxay bartaan oo qabtaan muusik kala duwan oo ka kala yimid dhaqamo iyo waqtiyo kala duwan. Ardayda waxay wax ku soo bandhigaan riwaayadaha dugsiga, xafladaha gobol iyo dhacdooyinka ciyaaraha fudud.

### Hobolada Bandhiga

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7948, HFA7949

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Labo simistar

Isu imaatinkan bandhigga ee sanadka oo dhan ah waxaa loogu talagalay ardayda heerka dhexe ilaa heerka sare ee dhigata qalabka Xargaha Kabanka, waxaana sidoo kale ku jiri kara qalabka Dabeysha, Turumbada, iyo qalabka la garaaco. Ardayda qalabka muusikada waxa ay dheelaan muusig ballaaran oo ka kala socda dhaqamo iyo waqtiyo kala duwan waxayna qabtaan riwaayadaha dugsiga iyo xafladaha gobolka. Ardaydu waxa ay yeeshaan xirfadaha cod soo saarka, laxameynta, qaafiyadda iyo sifeynta maqlitaanka, iyo horumarinta xirfadaha farsamada.

## Hobolada Riwaayadaha

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7946, HFA7947

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda dhigata koorsadan sanadka oo dhan ah waxay kaqaybqaataan bandhig faneedyo heer dhexe ilaa heer horumarsan oo lagu soo bandhigo suugaan tayo leh oo ka kala socota noocyo iyo dhaqamo kala duwan. Ardaydu waxay barataa farsamada codka iyo xirfadaha muusiga. Ardayda waxay wax ku soo bandhigaan riwaayadaha dugsiga iyo xafladaha gobol.

## Hobolada Qalabka Muusiga La Garaaco iyo Hobolada Qalabka Muusiga La Garaaco ee Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA8102, HFA8103 & HFA8104, HFA8105

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Labo simistar

Isu imaatinkan bandhigga ee sanadka oo dhan ah waxaa loogu talagalay ardayda daneyneysa ku ciyaarista qalabka muusiga la garaaco oo cod habeysan leh ama aan cod aan habeysneyn leh oo ay ku dheelaan koox isku dubarudan. Ardayda waxay bartaan oo qabtaan muusik kala duwan oo ka kala yimid dhaqamo iyo waqtiyo kala duwan. Ardaydu waxa ay kaqeybqaataan bandhigyada iyo waxqabadyada inta lagu jiro ama ka baxsan maalinta caadiga ah ee dugsiga, oo ay ku jiraan kaqeybgalka xafladaha iyo safarrada.

## Laabka Gitaarka 1 iyo 2

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7958, HFA7959

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Ardayda dhigata Laabka Gitaarka 1 waxa ay baran doonaan xirfadaha lagama maarmaanka ah iyo fikradaha si loo helo aqoonta aasaasiga ah ee gitaarka iyo akhriska muusiga. Laabka Gitaarka 2 waxaa loogu talagalay ardaydu in ay ku dhisaan fahamkii hore ee gitaarka oo ay sii horumariyaan xirfadahooda farsamada iyo muusiga.

## Laabka Biyaanada 1 iyo 2

**Koodhadhka Koorsada:** HFA8106, HFA8107

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Ardayda dhigata Biyaanada Gitaarka 1 waxa ay baran doonaan xirfadaha lagama maarmaanka ah iyo fikradaha si loo helo aqoonta aasaasiga ah ee kiiboodhka biyaanada. Laabka Biyaanada 2 waxaa loogu talagalay ardaydu in ay ku dhisaan fahamkoodii hore ee shaqada biyaanada iyo xirfadaha aragtida.

# Tiyaatarka

## Tiyaatarka Bilow, Heer Dhexe, iyo Heer Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7872, HFA7873, HFA7874

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Tiyaatarka Bilowga ah wuxuu diiradda saaraa fagaara ka hadlidda, mashaakil xallinta hal-abuurka leh, iyo iskaashiga ayaa lagu sahmiyaa waxqabadyo hal-abuur ah, jimicsiga codka iyo dhaqdhaqaaqa, hagaajin, qaab-dhismeed sheeko, abuurista dabeecadda, iyo daraasadda goobta. Tiyaatarka Heerka Dhexe waxaa ka mid ah falanqaynta farta casriga ah iyo midda qadiimiga ah, jihayta dhaqdhaqaaqa xirfadeed iyo hagista, iyo diyaarinta isla hadlidda ee la isku dayayo. Tiyaatarka Horumarsan waxaa ku jira mowduucyada sida hababka jilitaanka ee horumarsan, horumarinta siifiiga, farsamooyinka jilitaanka ku salaysan dhaqdhaqaaqa, maaweelada carruurta, shaqada maaskiga, hagaajinta, dagaalka masraxa, masraxa furan, ama riwaayadaha hal-abuurka ah.

## Soo Saarista Ciyaarta Tiyaatarka iyo Soo Saarista Tiyaatarka Muusiga

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7880, HFA7881

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Hal simistar

Soo Saarka Riwaayada Tiyaatarka waxay ardayda u diyaarisaa in ay isticmaalaan xirfadaha iyo farsamooyinka jilidda iyo bandhigga hal riwaayad ama ka badan oo loo soo saaro dadweyanaha daawanaya. Koorsadani waxay ka tarjumtaa heerarka tiyaatarka ee xirfadeed, iyadoo ku dhammaanaysa soo saarista buuxda ee riwaayad. Ardayda waxay sidoo kale fursad u heli karaan in ay ka shaqeeyaan aagaga wax soo saarka tiyaatarka oo ay ku jiraan hagidda, naqshadaynta goobta iyo dhismaha, xulashada lebiska, agabka qurxinta, maareynta masraxa, xayaysiimaha iyo caan-bixinta. Soo Saarka Tiyaatarka Muusiga waxa ay u diyaarisa ardayda in ay farsameeyaan xirfadaha iyo farsamooyinka jilista, heesida, qoob ka ciyaarka, iyo bandhiga soo saarista tiyaatarka ee muusiga ee dhagaystayaasha fagaaraha. Nidaamkan oo dhan ardaydu waxay horumariyaan bulshada iyagoo u shaqaynaya sidii koox ahaan.

## Naqshadeynta Lebiska Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA7924, HFA7925

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5

**Muddada:** Hal simistar

Naqshadeynta Lebiska Bilawga waxay u furan tahay dhammaan ardayda danaynaysa barashada farsamada nakhshadaynta lebiska iyo dhismaha. Korsadu waxay sahmisaa sida dabeecada iyo sheekada loogu soo gudbiyo dookhyada lebiska. Nakhshadeeyayaasha lebiska waxay ku bilaabaan falanqaynta dabeecadda iyo farta iyo fikradaha hagaha si ay u soo saaraan fikradaha nakhshadaynta. Ardaydu waxay iska kaashataa inay horumariyaan xirfadaha nakhshadaynta, wax sawirista, iyo adeegsiga qaab

lagu dhiso lebis. Ardaydu waxay khibrad ka heshaa xirfadaha tolmada gacanta iyo mashiinka si ay u dhisaan lebis gaar loo nakhshadeeyay. Naqshadeynta Lebiska ee Horumarsan waxay sii kordhisaa barashada farsamada nakhshadayanta lebiska iyo dhismaha. Ardaydu waxay iskaashi la yeelataa nakhshadeeyayaal iyo hagayaal si ay u nakhshadeeyaan una dhisaan lebis loogu talagalay wax soo saarada dugsiga uguna lug yeeshaan dhaqamo aad u waawayn oo ah nakhshadayn, sawirid, iyadoo la adeegsanayo qaabab, wax ka beddelo, iyo tolmo.

## Tiyaatarka Farsamada Bilow iyo Heer Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HCT2615, HFA7936, HCT2616, HFA7937

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 ilaa 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Hal sano ama labo simistar

Bilowga Tiyaatarka Farsamada waa koorso ay hagayso soosaarka taasoo bixisa xirfadaha aasaaska ah ee farsamada iyo habraacyada badbaadada ee ardayda u diyaarinaya dhinaca iyo barashada kulleejka ee tiyaatarka farsamada. Ardayda waxay ku lug yeeshaan naqshadaynta goobta iyo dhismaha, iftiiminta, codka, agabka qurxinta, lebiska, waxyaabaha la isku qurxiyo, waxyaabaha saameynta gaarka ah leh, maareynta tiyaatarka, maareynta masraxa, iyo erey bixinta tiyaatarka. Tiyaatarka Farsamada ee Horumarsan ayaa kor u sii qaadaya xirfadaha iyadoo ardaydu ay dabaqdo, gorfayso waxna ka caawiso abuurista fikrad midaysan oo wax lagu soo saaro waxaana ka mid noqon kara horumarinta boortofooliyo nakhshadeed.

# Farshaxanka Muuqda

## Dhoobada Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA8126, HFA8127

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Hal simistar

Dhoobada Bilowga ah ardaydu waxay ku shaqeeyaan dhoobo, iyagoo samaynaya qaybo farshaxan oo shaqaynaya iyo kuwo aan shaqayn labadaba. Ardaydu waxay u bartaan astaamaha dhoobada, hababka dhismaha, farsamooyinka dhaldhalaalinta iyo hannaanka gubidda. Ardaydu waxay wax ka bartaan farshaxanka dhoobada iyo farshaxanisteyaal ka kala socdo waayaha dambe iyo waayaha taariikheed iyo dhaqamada kala duwan. Dhoobada Heerka Horumarsan ardayda waxay waxbarashadaas kor u sii qaadaan heer sare iyagoo adeegsanaya hababka wax ku dhisidda gacmaha iyo garaangarta. Leyliyadu waa kuwo aad u adag, iyagoo ardayda ku xujeeya in ay sameeyaan xiriiro qoto dheer oo ay cod u adeegsadaan in ay ku gudbiyaan fikradaha. Ardayda waxa ay lahaanayaan boortofooliyo shaqo dhammaadka koorsada.

## Sawirista iyo Riinjiyaynta Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** HFA8128, HFA8129

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 0.5 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Hal simistar

Bilowga Sawirida iyo Riinjiyeynta waxa ay ardayda u bilowdaa Qeybaha Farshaxanka iyo Mabaadii'da Naqshadeynta. Daraaseynta kuwaan ayaa lagu daraa mashaariicda farshaxanka si loo dhiso fasiixnimada luqadda farshaxanka. Ardaydu waxa ay farshaxanka ku abuuraan baro kala duwan oo sawir-qaadista iyo riinjiyeynta ah waxayna sahamiyaan xiriirka ka dhexeeya indho-indheynta, aragtida farshaxanka, iyo curinta. Ardaydu waxa ay adeegsadaan buug-fagaareed ama habab kale si ay u horumariyaan xirfadaha iyo fikradaha. Sawirida iyo Riinjiyeynta Horumarsan waxaa loogu talagalay ardayda raba inay sii kordhiyaan aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda sawiridda iyo riinjiyeynta baraha. Ardaydu waxa ay sahmiyaan baraha iyo fikradaha leh madax bannaanida badan waxayna muujiyaan ka jawaabista iyo dib u milicsiga shaqadooda iyo tan kuwa kale. Ardayda waxa ay soo saaraan boortofooliyo shaqo dhammaadka koorsadan.

## AP Farshaxanka iyo Nakhshadaynta 2-D, AP Farshaxanka iyo Nakhshadaynta 3-D, Sawirista AP

**Koodhadhka Koorsada:** HFA3728, HFA3729, HFA3730, HFA3731, HFA3726, HFA3727

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0 Farshaxanka Muuqda iyo CTE

**Muddada:** Labo simistar

Koorsooyinkaan sanadka oo dhan ah waxay hab iswaydiin ku salaysan u soo bandhigaan barashada ku saabsan farshaxanka iyo nakhshadda ee hal aag oo diiradda la saarayo. Farshaxanka iyo Nakhshadda 2-D ee AP ardaydu waxay isku hawshaa agabka 2-D iyo hababka sida rinjiyeynta, naqshadaynta sawirada, sawir qaadista, sawir qaadista dhijitaalka ah, sawir gacmeedka dhijitaalka ah iyo kan soo jireenka ah, isku xirka sawirada, farshaxan ku daabicista, naqshadaynta dharka, tolida, iyo sawirista dharka faashiyoonka. Farshaxanka iyo Nakhshadda 3-D ardayda waxay ku lug yeelataa agabka 3-D iyo hababka sida qorista sheeyaasha, qaabaynta qaab-dhismeedka, dharka iyo maryaha, rakibista, sawir isu-gaynta, shaqada birta, dhoobada, iyo shaqada muraayadaha. Wax Sawirista AP ardaydu waxay isku hawshaa calaamad-samaynta, sawirista qadiimiga ah iyo midda dhijitaalka ah, rinjiyeynta, farshaxan ku daabicista, iyo shaqada baraha isku dhafan, halkaas oo ardaydu diiradda saaraan isticmaalka calaamadaynta, laynka, sagxadda, booska, iftiinka iyo hooska, iyo curinta. Inta lagu jiro simistarka labaad ee koorsada, ardayda waxay samaystaan boortifooliyo loo diyaarinayo in loo gudbiyo Guddiga Kulleejka AP.

# Luuqadaha Adduunka

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12

**FASALKA 6aad**
**FASALKA 7aad**
**FASALKA 8aad**

Luuqadaha Adduunka 1A iyo 1B
Luuqadaha Adduunka 2A iyo 2B

**FASALKA 9aad**
**FASALKA 10aad**
**FASALKA 11aad**
**FASALKA 12aad**

Luuqada Adduunka 1A iyo 1B
Luuqada Adduunka 2A iyo 2B
Luuqada Adduunka 3A iyo 3B (Waa ikhtiyaari)
Luuqada Adduunka 4A & 4B (Waa ikhtiyaari)
IB Luuqada Adduunka 4A & 4B (Waa ikhtiyaari)
IB Luuqada Adduunka 5A & 5B (Waa ikhtiyaari)
AP Luuqada Adduunka 5A & 5B (Waa ikhtiyaari)
AP Suugaanta Isbaanishka (Waa Ikhtiyaari)
IB Luuqada Adduunka 6A & 6B (Waa ikhtiyaari)

# Luuqadaha Adduunka

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga. Intaa marka laga yimaado, fadlan u tixraac qeybaha hore ee dukumiintigan si aad u hesho macluumaadka kusaabsan koorsooyinka buuxinaya shuruudaha qalin jabinta (boggaga 4-5).*

## Af-Carabi 1

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3470, HWL3472

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Carabiga waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Carabiga iyo Af-Carabiga Mareykanka.

## Af-Carabi 2

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3474, HWL3476

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Carabiga waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Carabiga iyo Af-Carabiga Mareykanka.

## Af-Shiineeska 1

**Koodhadhka Koorsada:** HWL1277, HWL1278

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Shiineeska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Shiineeska iyo Af-Shiineeska Mareykanka.

## Af-Shiineeska 2

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3579, HWL3580

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Shiineeska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Shiineeska iyo Af-Shiineeska Mareykanka.

## Af-Shiineeska 3

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3583, HWL3584

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Shiineeska iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Shiineeska. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Shiineeska iyo Af-Shiineeska Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Shiineeska.

## Af-Faransiis 1

**Koodhadhka Koorsada:** HWL1273, HWL1274

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Faransiiska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Faransiiska iyo Af-Faransiiska Mareykanka.

## Af-Faransiis 2

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3522, HWL3523

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Faransiiska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Faransiiska iyo Af-Faransiiska Mareykanka.

## Af-Faransiis 3

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3526, HWL3527

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Faransiiska iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Faransiiska. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Faransiiska iyo Af-Faransiiska Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Faransiiska.

## Af-Jabaan 1

**Koodhadhka Koorsada:** HWL1275 HWL1276

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Jabaanka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Jabaanka iyo Af-Jabaanka Mareykanka.

## Af-Jabaan 2

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3541, HWL3542

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Jabaanka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Jabaanka iyo Af-Jabaanka Mareykanka.

## Af-Jabaan 3

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3545, HWL3546

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Jabaanka iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Jabaanka. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Jabaanka iyo Af-Jabaanka Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Jabaanka.

## Isbaanish 1

**Koodhadhka Koorsada:** HWL1279, HWL1280

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Isbaanishka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Isbaanishka iyo Af-Isbaanishka Mareykanka.

## Isbaanish 2

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3560, HWL3561

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Isbaanishka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Isbaanishka iyo Af-Isbaanishka Mareykanka.

## Isbaanish 3

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3564, HWL3565

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Isbaanishka iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Isbaanishka. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Isbaanishka iyo Af-Isbaanishka Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Isbaanishka.

## Af-Isbaanishka loogu talagalay Dadka Dhaxalka ugu Hadla

**Koodhadhka Koorsada:** HWL3577, HWL3578

**Fasalada:** 9-12

**Buundada:** 1.0

**Muddada:** Labo simistar

Af-Isbaanishka loogu talagalay Dadka Dhaxalka ugu Hadla waa koorso taageerta, xoojisa oo balaarisa aqoonta ardayda ee luqadda Isbaanishka ee ardayda ku kortay ku hadalka Af-Isbaanishka. Ardaydu waxa ay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda afka ah iyo qoraalka ee Af-Isbaanishka iyaga oo muujinaya fikrado kakan oo sii kordhaya, baranaya suugaanta iyo sahaminta aqoonsigooda luqadaha badan iyo waaqica dhaqan-bulsheed ee kala duwan ee Af-Isbaanishka lagaga hadlo. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo sahminaya dhaqankooda sooyaalka oo daraaseynaya xaalado kala duwan oo Isbaanishka looga hadla.

***Farriin ku saabsan Koorsooyinka Sare iyo Koorsooyinka Luqada Dhaxalka:***

*Koorsooyin badan oo sare sida Dugsiga Caalamiga ah (IB), Meeleynta Sare (AP) iyo Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa ah (CIHS) ayaa lagu bixiyaa luqado kala duwan iyo iskuulo kala duwan. Intaa marka laga yimaado, koorsooyinka luqadda dhaxalka ayaa sidoo kale lagu bixiyaa luqado kala duwan. Ka hubi iskuulkaaga waxyaabaha laga bixiyo ee la heli karo.*

Fursadaha Waxbarasho iyo Shaqo ee Loo Wada Siman Yahay: Dugsiyada Dadweynaha Seattle, SPS, waxa ay bixiyaan Fursadaha Waxbarasho ee loo Wada Siman Yahay iyo Fursadaha Shaqo ee loo Wada Siman Yahay mana ku kala takooro wax barnaamijyo ah ama hawlo ah oo ku saleysan jinsiga; isirka; caqiidada; midabka; diinta; abtiriska; wadanka uu kasoo jeedo qofka; da'da; xaalada dhaqaale; nooca rabitaanka galmada, oo ay kujirto muujinta ama aqoonsiga jinsiga; uurka; xaaladda guurka; muuqaalka jirka; jiritaanka wax naafonimo dareen, maskax ama jireed; ka saarida halyeey sharaf leh ama xaalad militari; ama adeegsiga hage eey tababaran ama xayawaanka caawinta adeegga. SPS waxa uu sidoo kale bixiyaa helitaanka loo siman yahay ee Boy Scouts iyo kooxaha kale ee loogu talagalay dhalinyarada.

SPS waxa uu u hoggaansamaa dhammaan shuruucda iyo qawaaniinta gobolka iyo federaalka, oo ay ku jiraan laakiin aanay ku koobneyn: Ciwaanka IX ee Wax ka Beddelka Waxbarashada ee 1972; Ciwaanka VI Xeerka Xuquuqda Rayidka 1964; Qeybta 504 ee Sharciga dhaqancelinta ee 1973; Xeerka Ameerikaanka Naafada ah (ADA) ee 1990 iyo Xeerka Wax ka Beddelka ADA ee 2008; iyo Sharciga Washington ee Ka Dhanka ah Takoorka RCW 49.60. U hoggaansanaanta SPS waxaa kamid ah, laakiin aanay ku koobneyn dhammaan barnaamijyada degmada, koorsooyinka, iyo nashaadaadka, oo ay ku jiraan nashaadaadyo manhajka ka baxsan, adeegyada, iyo gelitaanka xarumaha.